

# **Aragtida Dhallinyarada** Gobolka Banaadir ka Qabaan Maamulka, Dowlad-dhiska iyo Kahortagga Colaadaha

HERITAGE INSTITUTE

**Diseembar 2024**

## Ku Saabsan Qoraaa

**Foosiya Warsame** waa cilmibaare ku takhasustay waxbarashada, oo muddo toban sano ka badan ku soo dhex jirtay waxbarashada. Waxa ay leedahay tacliin waxbarasho oo sare iyo waayo-aragnimo shaqo oo ku salaysan waxdhigis, cilmibaaris, dajinta manaahijta, doorarka maamulka iyo hoggaaminta.

## kaqaybgalayaasha

**Yuusuf Sheekh Cumar (PhD),** waa agaasimaha Barnaamijka II Talo Wadaag ee Machadka Daraasaadka Siyaasadda ee Heritage.

**Axmed Barre,** waa kaaliye cilmibaariseed oo ka tirsan Barnaamijka II Talo Wadaag ee Machadka Daraasaadka Siyaasadda ee Heritage.

**Ramla Xabbad,** waa kaaliye cilmibaariseed oo ka tirsan Barnaamijka II Talo Wadaag ee Machadka Daraasaadka Siyaasadda.

**Saciida Maxamed Xasan,** waa kaaliye cilmibaariseed oo ka tirsan Barnaamijka II Talo Wadaag ee Machadka Daraasaadka Siyaasadda.

**Xuquuqda daabacaaddan © 2024 | Waxa ay u dhawrsan tahay Machadka Daraasaadka Siyaasadda ee Heritage.**

Akhristayaasha waxa lagu dhiirrigalinayaa in ay sii tarmiyaan xogtan, oo ay iskood u daabacaan, balse sinaba ugama ganacsan karaan. Xaqle ahaan, Machadka Heritage waxa uu si xushmad leh uga codsanaynaa cid kasta oo daabacaddan sii badisaa, in ay mahadnaq iyo nuqul daabacaaddeeda ka mid ah noo hibayso. Adeegsiga khadka tooska ah, waxa aan waydiisanaynaa akhristayaasha in ay ku xirnaadaan macluumaadka shabakadda.

**© Heritage Institute for Policy Studies 2024.**

# Tusmada


| | | |
|---|---|---|
| 1 | Nuxurka Daraasadda | 4 |
| 2 | Hordhac | 5 |
| 3 | Habraaca Daraasadda | 8 |
| 4 | Milicsiga  Dhigaallada | 11 |
| 5 | Qeexidda Maamulka ee gobolka Banaadir | 15 |
| 6 | Qeexidda dawlad-dhiska ee gobolka Banaadir | 20 |
| 7 | Qeexidda khilaafaadka gobolka Banaadir iyo sida looga hortagi karo | 23 |
| 8 | Lafagurid | 28 |
| 9 | Gunnaanad | 32 |
| 10 | Talabixinno siyaasadeed | 33 |

# 1. Nuxurka Daraasadda

Dagaalkii sokeeye ee muddada dheer socday waxa uu si xun u wiiqay isku xirnaanta bulshada Soomaaliyeed, waxaanu burburiyey hay'adihii qaranka ee bulshada u adeegi lahaa. Ku guul darreysiga in la xalliyo asbaabihii keenay dagaalka ayaa sababay in fowdada iyo rabshaduhu sii socdaan, iyadoo dadaalladii nabadda iyo wadajirka bulshada ay hoos u dhaceen. Sida qaybaha kale ee bulshada ayay dhallinyarada Soomaaliyeed, u niyadjabiyeen, dhibbaneyaalna ugu noqdeen qabqableyaal-dagaal iyo kooxo argagixiso ah, kuwaaas oo u adeegsaday in ay ku fushadaan qorsheyaashooda gurracan. Inkasta oo Jamhuuriyadda saddexaad ee Soomaaliya la aasaasay sannadkii 2000-waa muddo ka badan 20 sano, haddana dowladahii is xigxigay wax dadaal ah kuma bixin in ay daboolaan baahiyaha muwaadiniinta Soomaaliyeed oo ay ku jiraan dhallinyarada oo ah mustaqbalka dalka.

Cilmibaaristani waxa ay baadhay waayo-aragnimada iyo aragtida 32 dhallinyaro ah oo ku nool Maamulka Gobolka Banaadir (Benaadir Regional Administration 'BRA') ee ku saabsan hababka maamulka iyo dhismaha dowladnimada Soomaaliya, oo ah waddan la daala dhacaaya dhibaatooyin kala duwan oo ay ka mid yihiin rabshado iyo qalalaase siyaasadeed oo ba'an. Si ka duwan aragtida guud ee ah in dhallinyaradu aysan lahayn aragti iyo waayo-aragnimo ku filan oo ay kaga qayb qaataan dhismaha dowladnimada iyo xallinta khilaafaadka, natiijooyinka aan helnay waxay muujiyeen aragtiyo ballaaran oo isku-dhafan oo ay dhallinyaradu si mugleh ugu biirin karaan dhismaha dowladnimada. Dhallinyaradu waxay carrabka ku adkeeyeen muhiimadda dhismaha dowladnimada iyo maamulka, iyaga oo muujiyey doorka muhiimka ah ee hoggaamin hiraal leh iyo hay'ado dawladeed oo tayo leh. Waxaa si gaar ah xusid u mudan, in dhallinyaradu ay inta badan si isku mid ah u adeegsadeen ereyada "hoggaamin" iyo "maamul", taasoo muujinaysa isku xidhnaanta labada macne.

Ka qaybgalayaashii dhallinyarada ahaa waxay sidoo kale soo bandhigeen arrimo bulsho oo baaxad leh kuwaas oo haddii si wanaagsan loo xalliyo gacan ka geysan kara dhismaha dowladnimada, sida amniga, waxbarashada, shaqo abuurka, caafimaadka, caddaaladda, iyo baahiyaha qaybaha bulshada ee la dayacay, sida dadka barakacayaasha ah (Internally displaced persons 'IDPs'). Waxay sheegeen in aan caqabadahan si wax ku ool ah lagu xallin karin iyadoo aan la helin hannaan maamul oo xooggan iyo hay'ado dawladeed oo si wanaagsan u shaqeeya. Waxey soo jeediyeen in habka dhismaha dowladnimada uu noqdo mid dhameystiran oo ka soo bilowda heer hoose, iyagoo rajo ka qaba in la helo hay'ado dowladeed oo mas'uul ah oo waxtar leh. Tani waxay meesha ka saaraysaa mala' awaalka ah in jiilkii dhashay muddadii dagaalka sokeeye aanu fahmi karin amaba saadaalin karin qaabka iyo mabaadi'da maamulka, maadaama ayna waligood waaqic ahaan ula noolaan.

Natiijooyinku waxay sidoo kale muujiyeen in dhallinyaradu si firfircoon u raadinayaan isbeddel bulsho iyo nolol tayo wanaagsan, oo ay leeyihiin faham qoto-dheer oo ku saabsan caqabadaha amniga ee dalka iyo fikrado lagu xallin karo arrimahaas.

Waa caddahay in fahamka gaarka ah ee ay leeyihiin ee dhibaatooyinka muddada dheer ee Soomaaliya ay bixin karaan aragti gaar ah oo ku saabsan sida loo maareeyo loogana jawaabo caqabadaha iyo khilaafaadka/colaadaha.

### Natiijooyinka kale ee muhiimka ah waxaa ka mid ahaa:

- Dhallinyaradu waxay ku qeexeen maamul wanaagga in uu yahay nidaam wax ku ool ah oo ku salaysan sharci iyo kala dambeyn, ilaalinta danta guud, iyo caddaalad u qaybinta khayraadka. Iyo sidoo kale dhismaha dowladnimada in uu yahay geeddi-socodka samaynta hay'ado karti leh oo ay ka mid yihiin baarlamaanka, dastuurka, laanta fulinta, iyo hay'adaha fulinta sharciga.
- Sida dhallinyaradu u arkaan, hoggaaminta wanaagsani waa in ay u suurto galisaa muwaadiniinta ineey gaaraan himilooyinkooda oo ay abuurto jawi ku habboon nabadda iyo barwaaqada.
- Waxay aaminsanyihiin in dhismaha dowladnimada ee goobaha colaadaha ka soo kabanaya uu yahay mid ku dhisan heshiis bulsheed ku salaysan is afgarad, kaas oo awood siinaya muwaadiniinta, horseedaya nolol wanaagsan, isla markaana ilaalinaya qiyamka, dhaqanka, iyo danaha guud ee muwaadiniinta.
- Gaar ahaan dhallinyarada dumarka ah waxay sheegeen in ay la kulmeen caqabado u goonni ah, gaar ahaan marka ay timaaddo helitaanka xilal sare ama in ay saameeyn ku yeeshaan hay'adaha dawladda. Caqabadahaas oo ay ka mid yihiin takoorid, hadallo liidaya dumarka, faraxumayn, ku xadgudub, iyo tacaddiyo xagga jinsiga ah.
- Arrimaha xaddidaya ka qaybqaadashada dhallinyarada ee ka hortagga khilaafaadka waxaa ka mid ah: la'aanta fursado tababar qumman; maqnaanta aqoon isu gudbinta jiilasha kala duwan; shaqo la'aanta dhallinyarada; iyo fikradaha qaldan ee xagga dhaqanka ah ayadoo loo malaynayo in aan dhallinyarada lagu aamini Karin xallinta khilaafaadka da'dooda oo yar iyo waaya-aragnimo la'aantooda awgeed.

## 2. Hordhac

Dhibaatooyinka dawlad-dhiska iyo maamul wanaaggu waxay ahaayeen caqabado joogto ah oo ka jiray muuqaalka siyaasadeed ee Soomaaliya tan iyo markii ay xornimada qaadatay 1960. Dalku waxa uu soo maray marxalado siyaasadeed oo qallafsan oo ay soo hoggaamiyeen maamullo kala duwan, laga soo bilaabo hoggaankii sida dimuqraadiga ah loo doortay ilaa nidaamkii hantiwadaagga ee milatariga ahaa, kadibna xilligii qabqablayaasha dagaalka, iyo hadda oo hannaanka qabiilka ku dhisan ee 4.5 la qaatay.

Habkan maamul ee aan degganayn waxaa uga sii daray dagaalka sokeeye ee dabadheeraaday, kaas oo sii qoto dheereeyay kala qaybsanaanta bulshada iyo burburka siyaasadeed ee ku saleysan qabiilka. Marka laga reebo sagaalkii sano ee ugu horreeyay xilligii dowladdii rayidka ahayd dimuqraadiyadda, bulshada Soomaaliyeed badankood waxaa laga fogeeyay hannaanka dawladnimo ee sida tooska ah noloshooda u saameeya. Intaa waxaa dheer, in hababkii dhaqanka ee xallinta colaadaha si weyn loo wiiqay, ayadoo aan weli la horumarin habab wax ku ool ah oo casri ah oo lagu xalliyo khilaafaadka/colaadaha. Cilmibaaristan waxay baadhaysaa aragtiyaha dhallinyarada gobolka Banaadir ka qabaan dhismaha dowladnimada, maamul wanaagga, iyo ka hortagga iyo xallinta khilaafaadka ee xaaladda colaadda kadib ee Soomaaliya, gaar ahaanna gobolka Banaadir.

Hannaanka maamulka iyo dawlad-dhiska waxaa guud ahaan loo arkaa habab ay dowladdu ku dejiso habraacyo lagu maareeyo arrimaha dalka, bixinta adeegyada dadweynaha, iyo ku dhaqanka sharciga iyo fulintiisa. Ka qaybgalayaasha kooxaha dhallinyarada ah ee diiradda saarayey mawduucan waxay ku qeexeen dhismaha dowladnimada iyo maamul in ay yihiin fikrado kala jaad ah oo shaqooyin badan qabta, iyaga oo si gaar ah u joojiyey muhiimadda hoggaamintu u leedahay gaadhista himilooyinka bulshada. Markii laga hadlayay khilaafaadka rabshadaha wata ee Banaadir, dhallinyaradu waxay iftiimiyeen dhinacyada taban ee la xiriira dhismaha dowladnimada iyo maamulka, iyo sidoo kale dhibaatooyinka deegaanka ku gaarka ah sida dhaqdhaqaaqyada burcadda maxalliga ah iyo rabshadaha ka dhasha caqabadaha bulsheed, oo ay ku jiraan shaqo la'aanta, yaraanta fursadaha waxbarasho, iyo ammaan xumada. Daraasaddan waxay iftiimineysaa mowduucyadan ayadoo lagu salaynayo aragtida dhallinyarada iyo daraasadihii hore intaba.

Markii la qeexayo erayga "dhallinyaro," dhallinyaradii ka qaybgashay daraasaddu waxay ku tilmaameen inay tahay xilli nololeed kala guur ah. Qeexidda qofka loo arko "dhallinyaro" way kala duwan tahay marka loo fiirsho dhaqamada kala duwan, waxaana saameeya arrimo badan. Dhaqanka Soomaalidu Waxa uu dhallinyaro u yaqaan dadka da'doodu u dhexeeyso 15 ilaa 40 sano.

Fahamka sida isbedelka hababka bulsheed, dhaqameed, deegaan iyo siyaasadeed ay u saameeyaan u gudubka dhallinyarada marxaladda qaangaadhnimada ayaa muhiim u ah astaynta doorkooda xaaladaha colaadaha ka dib, gaar ahaanna geeddi-socodyada nabadaynta.[1] Marka loo eego xaaladda Soomaaliya, waaayo-aragnimada dhallinyarada gobolka Banaadir waxaa si weyn u saameeyay colaadaha wajiyada badan ee socda, taas oo sababtay ammaan xumo baahsan, xasillooni darro, iyo qalalaase siyaasadeed.[2] Dhallinyaradu waxay leeyihiin kaalin gaar ah oo ay kaga jiraan bulshada Soomaaliyeed; waxay ka faa'iidaystaan waayo-aragnimada shakhsiga ah, waxay heleeli karaan fursadaha ka dhex jira bulshooyinka ay la noolyihiin, waxayna leeyihiin aragtiyo ku aaddan duruufaha ay la kulmaan qaybaha bulshada ee ugu nugul dalka, si gaar ahna dhallinyaradu.[3]

1. Smith, & Smith, Youth, Education
2. Deria, et al, Addressing the Gap
3. Ibid

**Ujeeddooyinka Cilmibaarista:** Ujeedada ugu weyn ee cilmibaaristan waa in la fahmo aragtiyada iyo waayo-aragnimada dhallinyarada gobolka Banaadir ee ku saabsan hannaanka dhismaha dowladnimada, maamul wanaagga, iyo ka hortagga iyo xallinta khilaafaadka ee gobolka Banaadir. Daraasaddu si gaar ah waxay isku dayaysaa inay gaadho ujeeddooyinkan soo socda:

1. In la baadho aragtiyada iyo waayo-aragnimada dhallinyarada ee la xidhiidha hannaanka dawlad-dhiska iyo maamul wanaagga ee gobolka Banaadir;

2. In la baadho aragtida iyo waayo-aragnimada dhallinyarada ee ku saabsan ka hortagga iyo xallinta khilaafaadka rabshadaha wata ee gobolka Banaadir;

3. In la tilmaamo caqabadaha xaddidaya ka qaybgalka dhallinyarada ee dhismaha dowladnimada, maamul wanaagga, iyo ka hortagga iyo xallinta khilaafaadka, isla markaana la soo jeediyo istaraatijiyado ku habboon xal u helidda caqabadahaas.

**Su'aalaha Cilmibaarista:** Su'aalaha cilmibaaristu waxay door muhiim ah ka qaataan hagidda iyo qaabaynta habka cilmibaarista, naqshadaynta, ururinta xogta, falanqaynta, iyo horumarinta mowduucyada muhiimka ah. Daraasaddan waxay ujeedadeedu tahay in lagu xalliyo su'aalaha cilmibaarista udub-dhexaadka u ah ee khuseeya aragtiyada iyo waayo-aragnimada dhallinyarada ee ku aaddan dawlad-dhiska, maamul wanaagga, iyo ka hortagga iyo xallinta khilaafaadka ee gobolka Banaadir:

1. Maxay dhismaha dowladnimada iyo maamulku uga dhigan yihiin dhallinyarada gobolka Banaadir?

2. Sidee dhallinyaradu u fahamsanyihiin ka hortagga/xallinta khilaafaadka ee gobolka Banaadir iyo guud ahaan Soomaaliya?

3. Waa maxay aragtida iyo waayo-aragnimada dhallinyarada ee ku saabsan doorkooda dawlad-dhiska, maamulka iyo xallinta khilaafaadka ee Banaadir?

4. Maxay yihiin caqabadaha hortaagan ka qaybgalka iyo ka qayb qaadashada dhallinyarada ee dhismaha dowladnimada, maamulka iyo xallinta khilaafaadka ee Banaadir?

**Muhiimadda iyo Baaxadda Cilmibaarista:**Daraasaddan waxay isku dayaysaa inay buuxiso gaabiska ka jira daraasadaha hadda jira ee ku saabsan dhallinyarada Soomaaliyeed, gaar ahaanna gobolka Banaadir, maadaama ay aad u yar yihiin aqoon-baariseedyada khuseeya duruufuhooda la xiriira maamulka, dhismaha dowladnimada iyo ka hortagga colaadaha. Si gaar ah, qorayaashu waxay ogaadeen in aaney jirin cilmibaarisyo diiradda lagu saarayo fikradaha iyo waayaha dhallinyarada gobolka Banaadir ee ku saabsan maamulka, hannaanka dhismaha dowladnimada iyo ka hortagga khilaafaadka rabshada wata.

Ujeeddada ugu weyn ee daraasaddan waa in la soo bandhigo aragtiyaha iyo waayo-aragnimada 32 wiilal iyo gabdho dhallinyaro ah oo ku nool gobolka Banaadir ay u leeyihiin arrimahan muhiimka ah ee kor ku xusan. Daraasaddan oo la sameeyey sanadkii 2023, waxay faahfaahinaysaa aragtiyaha gaarka ah ee ka qaybgalayaasha, inkastoo aan natiijooyinka soo baxay si guud loogu wada dabaqi karin dhammaan dhallinyarada ku dhaqan gobolka Banaadir amaba guud ahaan dhallinyarada Soomaaliyeed.

Sida ku cad qaybta soo socota, daraasaddan waxay isticmaashay habka kaqaybgalka (Participatory), iyadoo si buuxda u adeegsatay qaabka waraysi-kooxeedka ah. Waxaa la isticmaalay habka lafa-guridda nuxurka si loo fasiro xogta loogana jawaabo su'aalaha cilmibaarista si mug leh.

**Qaabdhismeedka Cilmibaarista:** Daraasadda waxaa loo habeeyay sidan soo socota: Waxay ku bilaabmaysaa nuxurka daraasadda, waxaa ku xiga hordhac, habraaca daraasadda oo faahfaahsan iyo milicsiga daraasadihii hore ee mawduucan. Intaa waxaa xiga soo bandhigidda sida dhallinyarada gobolka Banaadir u qeexayaan maamul, qaybaha maamul, dhismaha dowladnimada, iyo aragtidooda ku aaddan ka hortagga colaadaha/isku dhacyada. Sidoo kale cilmibaaristu waxay xambaarsan tahay gorfaynta natiijooyinka iyo gunaanadka oo ay weheliyaan talabixinno ku socda dejiyeyaasha siyaasadda.

## 3. Habraaca Daraasadda

Daraasaddan waxay adeegsatey hab cilmibaariseedka ka qaybgalka falka tooska ah oo ah hab ka dhigaya cilmibaarayaasha iyo ka qaybgalayaashaba kuwo ka qayb qaata hannaanka cilmibaarista si loo fahmo duruufaha iyo caqabadaha horyaalla bulshooyinka la daraasaynayo si loo sameeyo isbeddello togan. Hab-baariseedkan waa mid ku salaaysan xaaladaha gaarka ah, loona hirgeliyo sifo dhiirrigelineysa ka qaybgalka iyo la falgalka muwaadiniinta ee arrimaha maamulka iyo danta guud. Hab cilmibaariseedka ka qaybgalka falka tooska ahi sidoo kale waxay ujeeddadiisu tahay in sare loo qaado wacyiga bulshooyinku u leeyihiin waayohooda nololeed si loo qaado tallaabooyinka ku habboon. Habkan waxa uu ku dhisan yahay adeegsiga qababka tayo-koobka iyo tirakoobka ah.

Hawlaha cilmibaarista ka qaybgalka falka tooska ah ee gobolka Banaadir waxay socdeen in ka badan hal sano, taasoo ka soo bilaabatay horraantii Janaayo 2023 ilaa Maay 2024. Intii lagu guda jirey muddadaas, waxaan iskaashi la samaynay laba urur dhallinyaro iyo laba urur haween ah oo dhammaantood ka hawlgala gobolka Banaadir. Urur kastaba waxa uu soo xulay 15 xubnood oo uga qayb-qaata cilmibaaristan, maadaama Machadka Daraasaadka Siyaasaadka ee Heritage aanu dooneyn in uu asagu wax saameeyn ah ku yeesho habka magacaabista.

Markii ay ururradu soo xusheen ka qaybgalayaashooda, waxaanu xubnihii u qabanay kulan hordhac ah oo aannu ugu sharxayno Barnaamijka Talo Wadaag wajiga 2aad ee Machadka Daraasaadka Siyaasaadka ee Heritage iyo yoolashiisa. Talo-Wadaag waxay ujeedadeeddu tahay in la awoodsiiyo qaybaha la dayacay ee bulshada, oo ay ku jiraan dhallinyarada, si ay si wax ku ool ah uga qayb qaataan geeddi-socodka dawlad-dhiska, maamulka iyo nabadaynta. Iyadoo lala kaashanayo kooxaha dhallinyarada ah ee gobolka Banaadir lana fulinayo cilmibaarista ka qaybgalka falka tooska ah, barnaamijku waxa uu hiigsanayaa in uu soo gudbiyo faham guud oo ku saabsan mowduucan si loo helo xalal ku habboon waaqica. Intii lagu guda jiray kulankaas, ka qaybgalayaashii dhallinyarada iyo haweenka ahaa waxay koox kasta soo doorteen 6 xubnood oo ah ergo ku matasha kulannada iyo iskuxirka kooxahooda iyo Talo Wadaag si ay ugu wargaliyaan kooxahooda mirodhalka kulannadaas.

Bahda Talo Wadaag waxay si gaar gaar ah ula shireen kooxahaas dhallinyarada iyo haweenka ah. Intii lagu guda jiray doodaha, waxay qaar ka mid ah ka qaybgalayaashu soo jeediyeen in la sameeyo group WhatsApp ah si loogu wada xiriiri karo si waxtar leh looguna wadaago macluumaadka muhiimka ah sida xogaha- aqooneed, maqaallada, fiidiyowyada, iyo wixii arrimo amni ah ee ka soo kordha Muqdisho, gaar ahaan inta lagu gudajiro kulamada fool ka foolka.

Intii uu socday kulankii kowaad ee guud oo aan la yeelannay kaqaybgalayaasha waxaan ka wada hadalnay nooca tababarka ay danaaynayaan, annagoo qaybinay foomam qiimayn ah si loo soo jeediyo mowduucyada tababar ee faa'iidada leh. Kadib waxaan mudnaanta siinnay mowduucyada ugu badan ee la xusay, kuwaas oo la jaanqaadayey ujeedooyinka Talo Wadaag; aragtiyaha Islaamiga ah ee ku saabsan maamul, dhismaha dowladnimada, nabadaynta, iyo xuquuqda qaybaha la dayacay ee bulshada, sida dhallinyarada iyo haweenka, iyo qaybgalkooda siyaasadeed. Mowduucyada kale ee la soo jeediyay waxaa ka mid ahaa dib u heshiisiinta iyo xallinta khilaafaadka, doorka waxbarashada ee isbeddelka bulsheed, iyo in la qabto madallo lagu doodo.

Intii lagu jiray kulankii ugu horreeyay oo guud ee aan yeelanay waxaan kaqaybgalayaasha ka codsannay in ay soo jeediyaan tababareyaal aqoon fiican leh oo maxalli ah. Waxaa la soo xulay saddex haween ah iyo saddex rag ah si ay u fududeeyaan kulammada iyaga oo isticmaalaya dood-wadaagyo iyo soo-jeedinno isla falgal ku dhisan. Hawlaha waxaa ka mid ahaa sawir-gacmeedyo kooxeed, kuwaas oo ay ka qaybgalayaashu ku cabbireen aragtidooda ku saabsan maamul xumada iyo maamul wanaagga, hannaanka awood-qaybsiga qabiilaysan ee 4.5, nabadda, horumarka, xallinta khilaafaadka, wadajirka bulshada, rajada, iyo himilooyinka guud.

Mid ka mid ah natiijooyinka aan la filayn ayaa ahayd in qaar ka mid ah ka qaybgalayaashu ay xiiseynayeen shirarka Machadka Daraasaadka Siyaasadda ee Heritage ayna codsadeen casuumado, taas oo sii kobcisay waayo-aragnimadooda waxbarasho, fursadahooda xiriirka, iyo xirfadahooda isdhexgalka bulsheed.

Natiijooyinka daraasadda waxaa si weyn looga soo qaatay saddex waraysi-kooxeed oo lala yeeshay dhallinyaradii ka qayb gashay, kuwaas oo dhacay intii lagu guda jiray hawlaha ka qaybgalka.

Kahor inta aan la qabanin waraysi-kooxeedka, cilmi-baadhayaashu waxay booqdeen xafiisyada laba urur dhallinyaro ah oo kala ah: Dalladda Horumarinta Dhallinyarada Soomaaliyeed(Somali Youth Development Network) iyo Ururka Madaniga ah ee Dhallinyarada Soomaaliyeed (Somali Youth Civic Organization (SYCO), kuwaas oo ka caawiyey qorista ka qaybgalayaasha iyo bixinta talooyin ku saabsan diyaarinta su'aalaha qayb-ahaan diyaarsan.

Ka qaybgalayaasha waxaa la siiyay foomka oggolaanshaha oo Af-Soomaali ku tarjuman, kaasoo macluumaadka cilmibaarista si faahfaahsan u tilmaamaya. Cilmi-baadhayaashu sidoo kale waxay u sharaxeen ka qaybgalayaasha nuxurka foomka oggolaanshaha. dhammaan waraysi-kooxeedyada waxaa lagu qabtay hotel si wanaagsan amnigiisa loo sugo. Jawaabaha ka qaybgalayaasha waxaa loo rogey qoraal marka laga reebo qaybaha aan khusayn su'aalaha. Si kastaba ha ahaatee, jawaabaha dadban ee wax ku biirin kara natiijooyinka cilmibaarista waa la qoray.

waraysi-kooxeedyada waxaa lagu qabtay af-Soomaali. Maadaama nadaamka hab-dhiska iyo naxwaha labada luqadood kala duwanyahay, tarjumaadda eray-raaca ah waxay lumin kartaa macnaha ay ka qaybgalayaashu maanka ku hayeen ama waxaa ka dhalan karta tarjumaad aan toolmoonayn. Sidaas darteed, waraysi-kooxeedyada waxaa loo tarjumay/qoraal-rogey iyadoo la raacayo nadaamka luqadda Ingiriisiga. Si kastaba ha ahaatee, waxaan isku daynay inaan bixinno tarjumaadda saxda ah sida ugu macquulsan. waraysi-kooxeedyada waxaa laga qaaday 26-kii Febraayo 2023, waxaanna isticmaalnay taariikhdaas markii aan kaydinayney qoraalladda. Si kastaba ha ahaatee, waraysi-kooxeedyada waxaa la qoraal-rogey/lana tarjumay intii lagu jiray bishii Maarso 2023. Waxaan isticmaalnay tirooyinka si loo maldaho magacyada dhabta ah. Marka qaar ka mid ah ka qaybgalayaashu jawaabo badan ka bixiyaan hal su'aal ah, lambarkooda iyo jawaabahooda waxay ka muuqanayaan meelo kala duwan oo isla su'aashaas ah.

Ka qaybgalayaasha laba ka mid ah waraysi-kooxeedyadu waxay ka koobnaayeen 11 qof, halka midka saddexaadna uu ahaa 10 qof, taasoo ka dhigaysa tirada guud 32 ka qaybgale. Waraysi-kooxeed kasta waxaa la qaaday labo jeer. Qaybta hore (qiyaastii hal saac iyo bar) waxaa diiradda lagu saaray maamulka iyo dawlad-dhiska, halka qaybta labaad (qiyaastii 30 daqiiqo) ay diiradda saartay maaraynta khilaafaadka iyo ka hortagga colaadaha; dhammaantoodna waa la duubay. Waraysi kasta oo la duubayna waxaa laga kaydiyay labo nuqul oo ah qayb 1aad iyo qayb 2aad. Sida caadada u ah waraysi-kooxeedyada qaar ka mid ah ka qaybgalayaashu waxay door bideen in aaney ka jawaabin dhammaan su'aalaha. Intaa waxaa dheer, in qaar ka mid ah ka qaybgalayaashu ay u baxeen sababo kala geddisan awgood. Saddex cilmi-baadhe ayaa qaaday waraysi-kooxeedyada, ayadoo qoraal-rog kasta uu dib u eegayay cilmi-baadhe sadexaad. Dhammaan xogta oo ay ku jiraan waraysiyada la duubay iyo qoraalada loo rogey waa la ilaalin doonaa waxaana lagu kaydin doonaa muddo shan sano ah mid ka mid ah kombuyuutarada Machada oo badqabkiisa aad loo ilaaliyay.

**Tusaalooyinka koodhka:** DH1M23 = Dhallinyaro Wiil1 Maarso 2023; DG5M23 = Dhallinyaro Gabadh5 Maarso 2023.

Cilmi-baadhayaashu waxay uruuriyeen qayb ka mid ah xogaha shakhsiga ah ee ka qaybgalayaasha, sida da'da, waxbarashada, iyo shaqada. 21 ka mid ah 32 waxay ahaayeen 18-35 sano jir, 5 kalena waxay ahaayeen 26-30 sano jir. Saddex kaliya ayaa ahaa 30-40 sano jir. Saddexda ka qaybgale ee tirada ka dhiman ma sheegin da'dooda. 25 waxay ahaayeen jaamiciyiin, labo na waxay ahaayeen dad dugsi sare ka baxay. Inta soo hartayna ma sheegin heerka waxbarashadooda. Tirada ugu badan oo ah 24 ka qaybgalayaal kamid ah ma shaqaynayn. 6 ka qaybgale oo jaamiciyiin ahaa waxay haysteen shaqooyin. Hayeeshee, qaar ka mid ah ka qaybgalayaashu ma dhamaystirin foomka qiimaynta.

# 4. Milicsiga Daraasadaha

## 4.1 Doorka ay colaadda kadib dhallinyaradu ku leeyihiin maamulka iyo dowlad-dhiska Afrika

Marka la eego maamul iyo dhismaha dowladnimada ka dib colaadaha, dhallinyaradu waxay door muhiim ah ka ciyaareen xoojinta wadajirka bulshada iyo wax ka qabashada nuglaanteeda dhaqan-dhaqaale iyadoo uu maqanyahay adeeggii dowladeed.[4] Iyagoo loo kala saarayo ururro rasmi ah oo loo asaasay si ay dhallinyarada kale gacan u siiyaan amaba ah hidisayaal dhallinyaro oo aan rasmi ahayn, tusaalayaasha hay'adaha dhallinyarada ee ku hawllan arrimaha maamulka iyo dawlad-dhiska waxay iskugu jiraan ururro bulshada rayidka ah, urur diimeedyo, dhallinyaro iyo dallad goboleedyo dhallinyaro ah.[5]

Sida uu dhigayo Axdigii lagu aasaasay Ururka Midowga Afrika,  dhallinyarada waxaa loo aqoonsaday in ay yihiin daneeyeyaal muhiim ah oo ka qayb qaata hannaanka dawlad-dhiska, waxaa jira isbeddel guud oo ku dhacay mawqifka rasmiga ah ee dawladaha iyo bahda waxbarashada oo ah in la tixgeliyo kaalinta dhallinyaradu ku leeyihiin geeddi-socodka nabadaynta.[6]  Dhallinyarada waxaa loo arkay in ay yihiin qaybaha ugu muhiimsan iyo jilayaasha ka dambeeya xoojinta adkeysiga, ammaanka, iyo nabadda iyadoo lagu salaynayo karaankooda bulshadeed, siyaasadeed iyo dhaqameed.[7] Ka qaybgalka ururrada dhallinyarada ee hannaanka dhismaha dowladnimada waxay sidoo kale la xiriirtaa isbeddelada qaab-dhismeedka bulshada kuwaas oo sahlaya ka qaybqaadashada dhallinyarada ee arrimaha siyaasadda, bulshada iyo dhaqaalaha.[8] Sidoo kale, yagleelidda barnaamijyo rasmiga ah, ilo dhaqaale iyo ka go'naanshaha dowladaha iyo hay'adaha caalamiga ah waa tiirarka lafdhabarta u ah ka qaybgalka dhallinyarada ee arrimahan si macna leh.[9]

Mabda' ahaan dadaallada dhallinyaradu waxay la xiriiraan halganka awood-siinta iyo isku filnaantooda.

4. Berents, and Mollica, Youth and Peace
5. Kasherwa, The Role of Youth ; Smith, and Smith, Youth, Education; Ruppel,and Steinbach, Hopes and Dreams
6. Yingi, Youth Bulge as Peacebuilding.
7. Berents, and Mollica, Youth and Peacebuilding; Yingi, Youth Bulge as Peacebuilding; Tainturier, Youth Inclusion
8. Ibid
9. Berents, Mollica, Youth and Peacebuilding.

Ayadoo midda hore ay khuseeyso horumarinta kartida shaqsiga si uu ugu dhex shaqeeyo nidaam gaar ah oo jira, halka tan dambena ay la xiriirto la loolanka nidaam jira oo la aaminsan yahay in uu ku dhisanyahay caddaalad darro.[10] Iyadoo labadaas arrinba wax laga qabanayo, aaladaha hawlaha dhallinyarada si guud waxaa ka mid ah waxbarashada, isku xirka, abaabulka, iyo u dhaqdhaqaaqidda arrimaha siyaasadda.[11] Kartida dhallinyarada ee xagga maamulka iyo dawlad-dhiska waa mid ku suntan tusaaleyaal nool oo muujinaya dadaallada hoggaamin, hagid iyo dhisidda karaanka.[12] Sidoo kale dhallinyaradu waa xubnaha ugu muhiimsan hawlaha dib-u-dhiska dalalka colaadaha kasoo baxaya, iyagoo si firfircoon u raadinaya siyaabo ay uga qaybnoqdaan dhismaha nabadda, waxayna abaabuli karaan facooda iyo qaybaha kale ee bulshada maadaama ay iyagu si gaar ah u fahamsan yihiin duruufaha deegaanka iyo arrimaha mudnaanta u leh.[13]

Si kastaba ha ahaatee, waxtarka iyo cimri dheerida hindisayaashaas waxaa saameyn taban ku leh caqabadaha ka dhasha waddamada colaadaha ka soo kabanaya iyo guud ahaan qaab-dhismeedka dawladnimo ee Afrika xornimada kadib, kuwaas oo xaddidaya baaxadda iyo awoodda ururrada dhallinyarada.[14] Caqabadaha adag ee hor taagan ka qaybgalka dhallinyarada waxaa ka mid ah liidid, yasid iyo faquuqid ay bulshada kala kulmaan iyo weliba garab-istaag dhaqaale, bulsheed ama hay'adeed la'aantood.[15] Ka fogaynta dhallinyarada ka qaybgalka siyaasaddu waxa uu wiiqayaa heshiiska bulshada, iyadoo ay dhallinyaradu ku tilmaamayaan ka fogeeyntaas mid ka mid ah hababka rabshadaha hab-bulsheed iyo maskaxeed taasoo qayb ka ah awood-siin la'aanta siyaasadeed, bulsheed, dhaqameed iyo dhaqaale oo dhallinyarada u keeneeysa in ay ka aamin baxaan dawladda iyo hannaanka dawladnimadaba.[16] Intaas waxaa sii dheer, dayacaadda iyo dhayalsiga taariikhiga ah ee dhallinyarada waxay halis gelineysaa dhismaha dowladnimada suurtagalnimada kacdoon bulsho iyo rabshado ka dhasha awgood markasta oo iska indhatiridda dawladda ee tabashooyinka iyo baahiyaha dhallinyarada sii daba dheeraato.[17]

Marka la eego waaqica Soomaaliya, dhallinyaradu waxay la kulmaan caqabado iyo dayacaad taas la mid ah. waxayna la'yihiin fursado ay kaga qaybqaataan maamulka iyo dhismaha dawladnimo, taasoo sii xadideysa wax ku biirintooda nabadda, xasilloonida iyo horumarka dalkooda. Maadaama kaqaybgalka dhallinyarada lala xiriiriyo xorriyadooda dhaqaale, dhallinyarada Soomaaliyeed waxay sii ahaan doonaan kuwo banaanka ka jooga hannaanka siyaasadeed oo aan ka qaybgal macno leh ku lahayn. Maadaama dhalinayaradu yihiin mustaqbalka maamulka iyo hoggaanka dalka, ka qaybgalkoodu waa habka lagu hubin karo laguna ilaalin karo horumarka qaranka iyadoo la tixgelinayo qiyamka dhaqanka iyo baahiyaha bulshada ka soo kabaneeysa colaadda intaba.[18] Dhallinyarada Soomaaliyeed si la mid ah dhiggooda dalalka kale ee Afrika badanaa way buuxiyaan kaalintaas iyagoo u maraya u ololeynta nabadda, xuquuqul insaanka, rabshad la'aanta iyo baraaraha buldhada ee heer gobol iyo heer qaranba.

10. Tainturier, Youth Inclusion
11. Kasherwa, The Role of Youth Organizations
12. Berents, Mollica, Youth and Peacebuilding; Peace and Security Council of the African Union, A Study on the Roles.
13. Berents, Mollica, Youth and Peacebuilding; Peace and Security Council of the African Union, A Study on the Roles.
14. Kasherwa, The Role of Youth Organization; Berents, and Mollica, Youth and Peacebuilding; Smith, and Smith, Youth, Education.
15. Yingi, Youth Bulge as Peacebuilding; Peace and Security Council of the African Union, A Study on the Roles.
16. Smith, and Smith, Youth, Education; Simpson, the Missing Peace.
17. Bangura, We Can't Eat Peace.
18. Amupanda, Who is in the "We".

## 4.2 Ka qaybgalka dhallinyarada ee dhismaha nabadda Soomaaliya iyo caqabadaha ka qaybnoqoshada

Doorka dhallinyarada ee nabad-dhiska Soomaaliya waxaa saameeya arrimo la xiriira colaadda wijiyada badan ee sii socota.[19] Cilmibaadhisyo iyo cadaymo faahfaahsan oo ka tarjumaya aragtida dhallinyarada Soomaaliyeed waxay muujinayaan fursaddooda weyn ee kaqaybgal balse la dayacay iyo weliba doonista dhallinyara in ay adeegsadaan xuquuqdooda matalaadda saameeynna ku yeeshaan aayohooda.[20] Dhallinyaradu waxay bulsho weynta Soomaaliyeed ka yihiin qiyaastii 70%, taasoo ka dhigaysa awood weyn iyo khayraad/hanti aan la qaddarin, xattaa marka dhanka cududda tirada oo kaliya laga eego.[21]

Waxaa kordhay dhallinyarada isu sharaxday doorashooyinkii ugu dambeeyey. Waxaa riixayey doonis isbeddel iyo in ay la loollamaan habka awooddu u qaabaysan tahay, iyagoo ololeyaashooda ku salaynaya baahiyaha iyo danaha bulshooyinka maxalliga ah gaar ahaanna qaybaha la dayacay.[22] Marka dhinacaa laga eego, in qaabaynta mustaqbalka Soomaaliya iyo geeddi-socodka nabaddaynteeda ay yihiin kuwo ku xiran ka qaybgalka iyo waxqabadka dhallinyarada waa arrin sax ah oo lama huraan ah.[23] Dhallinyaradu waxay la kulmaan caqabado badan oo isku dhafan oo degsan kuwaas oo asal ahaan ka so farcamaya dhibaatada dawladnimada Soomaaliya haysta.[24] Soomaaliya iyadoo tusaalaha ugu habboon u noqotay qaran jabka, dhibaatadeeda dawladnimo waa mid ku astaysan fashil siyaasadeed, ku tagrifalka khayraadka, siyaasadda haybta qabiil iyo qabyaaladda ku dhisan iyo musuqmaasuq.[25] Arrimahaasi waxay khatar ku yihiin oo wiiqayaan xiriirka dawladda iyo shacabka, iyagoo fogeeynaya qaybo badan oo bulshada ka mid ah siina xoojinaya sababaha hurrinaya colaadaha heer deegaan iyo heer qaranba.[26] Waxaa jira cillado gaar ah oo ku jira dastuurka iyo hirgelintiisa kuwaas oo kasii qaybqaadanaya nadaamka caddaalad darrada ku dhisan oo horseedaya matalaadda siyaasadeed ee kala dhantaalan, taasoo markeeda sii xoojineysa matalaad la'aanta danaha dhallinyarada oo ah daneeyayaasha nabad-dhiska.[27]

Dhallinyaradu sidoo kale waxay ka mid yihiin qaybaha bulshada ee u nugul isbeddelka cimilada iyo colaadaha, maqnaanshaha wadajirkii bulshada, kaabayaashii dawladda iyo culeeysyada dhaqaale ee haysta dartood.[28] Haddaba, arrimahaas waxay la xiriiraan caqabadaha dhallinyarada ka hortaagan ka qaybqaadashada hannaanka nabadaynta, inttaa waxaa sii raaca la'aanta taageero bulsheed iyo mid dawladeed, ka faquuqa siyaasadeed, yasidda, maqnaanshaha maalgelin ay helaan hindiseyaasha dhallinyaradu, kala sooc ku salaysan hayb qabiil mid xagga jinsiga ah iyo tabashooyin xagga amniga ah.[29]

19. Deria, et all, Addressing the Gap.
20. United Nations in Somalia, Somali Youth Converge; Deria, et al, Promoting Youth Inclusion; Bincof, The Role of Youth.
21. United Nations Assistance Mission in Somalia, Shaping Peace Together.
22. Abtidon, Somalia: Long-Awaited.
23. United Nations Assistance Mission in Somalia, Somali Youth: The Voices.
24. Odowa, State-Society Relations; Deria, et al, Promoting Youth Inclusion.
25. Odowa, State-Society Relations; Deria, et al, Promoting Youth Inclusion.
26. Odowa, State-Society Relations.
27. Stremlau, Consstitution-Making; Deria, et all, Addressing the Gap; Bincof, The Role of Youth.
28. Lwanga-Ntale, Understanding Vulnerability.
29. Deria, et all, Addressing the Gap; Bincof, The Role of Youth.

Inkastoo ay jiraan dadaallo lagu xoojinayo kaalinta dhallinyarada ee geeddi-socodka nabadda iyo dib-u-heshiisiinta iyadoo loo marayo ciyaaraha, istaraatijiyadaha siyaasadda federaalka, iyo barnaamijyada hay'adaha caalamiga ah ee aan dawliga ahayn (INGO), hadana waxaan jirin tallaabo dawladeed oo muuqata oo wax looga qabanayo shaqo la'aanta iyo sinnaan la'aanta xagga dakhliga ah, arrimahaas oo keenaya faquuqa dhallinyarada iyo faldembiyeedyo.[30]

Iyadoo dhallinyarada Soomaaliyeed la daaladhacayaan fursado la'aan,[31] ayaa arrimo badan oo isku xir xiran oo isugu jira cadaadis bulsho, shaqo la'aan, fikirka waxbarashada dalka laga qabo oo ah in ay tayadeedu liidato, nabadgelyo xumo iyo culeeysyo ku la xiriira muwaadinnimada qofka Soomaaliga ah ay sabab u noqdeen in qaar ka mid ah dhallinyaradu fursado ka raadsadaan dalka dibaddiisa.[32]

Daraasad ku saabsan sababaha shaqo la'aanta qalin-jabiyayaasha ayaa waxa lagu ogaadey in jinsiga, waayo-aragnimada, nooca shahaadada iyo da'du ay kordhiyaan fursadaha shaqo, sida ku cad muunadda (sample). Taasoo muujineeysa in kala sooca iyo helitaanka fursadaha goobaha shaqo ee guduhu yihiin arrimaha lafdhabarta u ah shaqaaleeysiinta dhallinyarada.[33] Xaaladda dhallinyarada Soomaaliyeed waa mid hoosta ka xarriiqaya baahida loo qabo in laga helo dawladda iyo jilayaasha aan dawliga ahaynba ka go'naansho iyo tallaabooyin loo qaado sidii dhallinyarada looga qaybgelin arrimahan.[34] Sannadihii u dambeeyey waxaa socdey isku dayo arrintan loogu jiro ayadoo loo marayo hindiseyaal khuseeya ururada rayidka ah ee dhallinyarada, hay'adaha caalamiga ah ee aan dawliga ahayn iyo kuwa maxalliga ah iyo dawladda Soomaaliya, sida iskaashiga u dhexeeya dawladda Soomaaliya, Sanduuqa Dadweynaha ee Qaramada Midoobey iyo Ururka Badbaadada Soomaaliya (Somali Lifeline Organisation) kaas oo looga gol lahaa dhisidda karaanka dhallinyarada magaalada Doobley.[35]

Wax wada qabsiga ka dhexeeya dhallinyarada iyo jilayaasha kale fududaysay/sahashey doodaha ku saabsan sare u qaadidda ka qaybqaadashada dhallinyarada guud ahaan waaxyaha iyo xal u helidda caqabadaha ka qaybgalka ee ka dhex jira nidaamka dawladnimo.[36] Marka laysku soo duubo,  adkaysiga iyo doonista in caqabadaas lala tacaalo lagana qaybqaato geeddi-socodka dhismaha nabadda waa mid ka guuxaysa dhammaan dhallinyarada Soomaaliyeed, waana masuuliyadda dawladda iyo jilayaasha kaleba saaran in ay aqoonsadaan, badhitaaraan oo dhiirigeliyaan dadaallada loogu jiro ka qaybgalka dhallinyarada ee hay'adaha rasmiga ah iyo kuwa kaleba.[37]

30. Deria, The Role of Youth ; Ali, Modelling the Determinants; Mercy Corps, Examining the Links; Altai Consulting, Youth, Employment and Migration; Yusuf, et al, Development of the Democratic System In Somalia.
United Nations Population Fund Activities in Somalia (UNPFA), The National Youth Policy.
31. Deria, et all, Addressing the Gap; Bincof, The Role of Youth.
32. Ali., Going on Tahriib.
33. Ali, Modelling the Determinants.
34. Ibid.
35. Abdullahi, Somali Youth Shaping.
36. United Nations in Somalia. The National Youth Policy.
37. Deria, et all, Addressing the Gap; Bincof, The Role of Youth; AMISOM News, Youth from Banaadir.

# 5. Qeexidda Maamulka ee gobolka Banaadir

Waxaa la waydiiyey kaqaybqaatasha waraysi-kooxeedka in ay tilmaamaan waxa ay ku micnayn karaan 'maamul'. Waxaanu noqday qeexitaankii ugu badnaa ee soo noqnoqday mid la xiriira hoggaaminta bulshada dhexdeeda ah iyo tan qarankaba. Iyadoo ka qaybgalayaasha cilmibaaristu xoogga saareen astaamaha iyo waajibaadka laga rabo madaxda la doorto iyo suurtagalnimada /fursadaha ay shakhsiyaadku ku noqon karaan hoggaamieyaal bulshadooda dhexdeeda. Tusaale ahaan, mid ka tirsan ka qaybgalayaashii waraysi-kooxeedka kowaad ayaa waxa uu 'maamulka' ku qeexay in uu yahay "sida bulsho u doorato madaxdeeda". [38] Halka ka qaybgale kalena ku tilmaamay in uu yahay "marka dadku isu yimaaddaan oo ay doortaan hoggaankooda, kaasoo markaa hagaya oo hanuuninaya……sida dal iyo madaxweynihiisa".[39] Ka qaybgale sadexaad ayaa asaguna ku qeexay 'maamulka' in uu yahay mid "keensanaya ahaanshaha hoggaamiye bulsho oo firfircoon".[40] Gabadh ka tirsanayd waraysi-kooxeedka kowaad ayaa 'maamulka' u kala saartay mid gaar ah iyo mid guud, iyadoo kan hore uu ku saabsan yahay sida qofku u maamulo naftiisa bulshada dhexdeeda, halka kan dambena tilmaamayo sida loo maamulo bulshada.[41]

Haddaba, jawaabahaasi waxay muujiyeen in dhallinyaradu ay dareensan yihiin in hoggaaminta qofeed iyo tan siyaasadeed ee heer bulshada dhexdeeda iyo mid qaranba ay lagama maarmaan tahay. Intii lagu guda jirey qeexitaanka' hoggaaminta', waxay ka qaybgalayaasha dhammaan waraysi-kooxeedyadu isla qireen in ay jiraan astaamo hoggaaminta u gaar ah kuwaas oo ku suuban maamul wanaagga, sida xoogga, go'aan adaygga, kartida, isla xisaabtanka iyo daah-furnaanta. Mid ka mid ah ka qaybgalayaasha ayaa xusay in macnaha 'maamul' xambaarsan yahay hoggaamin ku dhac leh, ku dhacaasina waxa uu lagama maarmaan u yahay in ay bulshadu natiijo fiican gaadho.[42] Ka qaybgalayaal kale waxay iyagu dulmar ku sameeyeen astaamaha aan kor ku soo xusnay si ay u balbalaariyaan waajibaadka iyo masuuliyadaha saaran hoggaanka, iyagoo ku saleynaya qeexiddooda maamulka.

Gabadh waraysi-kooxeedka 2aad ka tirsanayd ayaa sheegtay in kaalinta dawladdu tahay in ay hortabinta siiso danta muwaadiniinteeda ayna abuurto bay'ad/bii'ad ku habboon nabadda iyo baraaraha.[43] Ka qaybgale kale waxa uu asaguna shaaca ka qaaday waajibaadka dadweynaha saaran taasoo ah masuuliyad wadareed si loo kor joogteeyo waxkasta oo arrimaha bulshada ku saabsan, "si la mid ah sida hooyadu u daryeesho waxkasta oo guriga ku saabsan".[44] Ka qaybgalayaal kale waxay tibaaxeen doorka hoggaanku ku leeyahay samaynta hagis siyaasadeed iyo inuu bulshada ku caawiyo in ay xaqiijiyaan yoolal u gaar ah.[45] Nin kale oo dhallinyaro ah ayaa waxa uu sii raaciyey in masuuliyaddani koobsaneeyso hirgelinta nidaam waxtar leh iyo dhaqan maamul oo dadka kala haga.[46] Ugu dambeyn, ka qaybgale ayaa si gaar ah u tilmaamay in doorka dawladdu yahay in ay hubiso in muwaadin kasta loola dhaqmo si caddaalad ah, oo eex la'aan ku dhisan.[47]

38. Focus group 1, YW 8.
39. Focus group 3, YW 11.
40. Focus group 1, YM 1.
41. Focus group 1, YW 2.
42. Focus group 1, YM 4.
43. Focus group 2, YW 6.
44. Focus group 1, YW 6.
45. Focus group 1, YW 10.
46. Focus group 2, YM 9.
47. Focus group 2, YM 3.

Fikradaha kale ee ka qaybgalayaashu ka doodeen waxaa ka mid ahaa nidaamka bulshada iyo danta guud oo ah halka uu asal ahaan diiradda saaro maamulku. Nin kale oo dhallinyaro ah oo ka tirsanaa waraysi-kooxeedka 1aad ayaa xusay in jiritaanka rabitaanka u hoggaansanka amarada iyo ismaqalku ay yihiin shuruudaha horseeda dawladnimo shaqaysa.[48] Qeexitaanka maamulka ee ka qaybgale kalena waxaa ka mid ahaa "waxaa xiriir aasaasiya kala dhexeeya kobcinta qaadidda wadajirka bulshada".[49]

Haddaba danaha guud ee muwaadiniinta, sida ay ka qaybgalayaashu caddeeyeen, waxaa ka mid ah: nabadda, barwaaqada, nabadgelyada, adeegyada dadweynaha, nidaam garsoor iyo helidda xuquuqda sharciga ah.[50] Hab-dhisyada kaabaayaa shaqada dawladda waxay ku salaysan yihiin mabaadi'da dawladda ku dhisan tahay.[51] Ka qaybgale ka tirsanaa waraysi-kooxeedka 2aad ayaa xusay in dawladdu ku salaysan tahay heshiis dadweyne/bulsho oo wada-ogol ah, iyadoo mid kalena uu ku waafaqay in ay tahay in u hoggaanka lagu ilaaliyo in uu raaco xeerar dhaqan oo ay umaddu isku waafaqsan tahay. Ka qaybgale saddexaad oo tirsanaa waraysi-kooxeedka 2aad ayaa asaguna sheegay in maamulka ay ka laasimeyso in shakhsiyaadku ay xeerar sameeystaan kadibna ay u hoggaansamaan kuna kala baxaan.[52] Fikirka guud ee ka qaybgalayaasha Waxa uu ahaa sare u qaadidda isla xisaabtanka si qof ahaaneed iyo si wadar ahaanba, iyo sidoo kale daah-furnaanta maamulka dhexdiisa/gudihiisa ah.[53]

Qeexitaanno kale oo ka mid ah jawaabaha ka qaybgalayaasha waxay maamulka la xiriiriyeen caddaaladda iyo sinnaanta oo ah yooalal bulsho oo qaybna ka ah isku tiirsanaanta bulshooyinka. Labo ka qaybgale oo ka tirsanaa waraysi-kooxeedka 3aad ayaa sheegay in aragtidooda maamulku yahay mid ku xiran u in qof walba, oo ay ku jiraan madaxda dawladdu, sharciga u hoggaansanaado, iyagoo carrabka ku dhuftay "in aan qofna sharciga ka sarreeyn".[54] Waxaa intaas dheer, in dhammaan waraysi-kooxeedyada ay ka qaybgalayaashu maamulka ku xiriiriyeen in khayraadka si caddaalad ah loo qaybiyo, bixinta adeegyada dadweynaha iyo in la dhawro xuquuqaha.[55] Gabadh ka tirsanayd waraysi-kooxeedka 3aad waxay xustay in, marka laga gudbo caddaalada, waxbarashadu ay tahay arrimaha mudnaanta u leh maamulka gaar ahaanna dadka baahiyaha gaarka ah qaba, iyadoo tilmaantay waajibaadka bulshada ka saaran qaybaha ugu nugul bulshada.[56] Ugu dambayn, jawaabaha qaar badan oo ka mid ah ka qaybgalayaashu waxay ku doodeen isku tiirsanaanta bulshada marka la eego masuuliyadda qofeed iyo midda wadareedba iyo in laysu kaashado sidii danta guud loo xaqiijin lahaa.[57]

48. Focus group 1, YM 3.
49. Focus group 2, YW 6.
50. Focus group 2, YW 6 & YM 3; Focus group 3, YW 6, YW 5, YW 4, & YM 7.
51. Focus group 2, YM 3 & YW1.
52. Focus group 2, YM 2.
53. Focus group 2, YW 1; Focus group 3, YM 7.
54. Focus group 3, YW 1 & YM 8.
55. Focus group 3, YW 6; Focus group 2, YM 4.
56. Focus group 3, YW 5.
57. Focus group 3, YM 9.

## 5.1 Doorka dhallinyarada ee maamulka gobolka Banaadir

Markii ka qaybgalayaasha la waydiiyey in ay qeexaan 'kaalinta dhallinyarada ee maamulka gobolka' waxaa soo if baxay labo mawduuc oo kala ah: kaalintooda iyagoo ah jilayaal dhaqaale iyo saameeyayaal arrimaha bulshada. Marka loo eego dhammaan waraysi-kooxeedyada, ka qaybgalayaashu waxay hoosta ka xariiqeen sida dhallinyaradu u hoggaaminayaan koboca ka socda dhinaca ganacsiga gobolka, gaar ahaanna ay u yihiin hal-abuurayaal ganacsi ee dhinaca dalxiisaka.[58] Gabadh ayaa sheegtay in isgoyska Taleex ee gobolkga Banaadir oo ah degmo ganacsi oo sii fideeysa oo ay leeyihiin dhallinyaro ay ka qaybqaadatay quruxda iyo bilicda aaggaas.[59] Ka qaybgale kale ayaa sheegay in dhallinyaradu bulshada gobolka ku dhaqan ka yihiin 70%, sidaas awgeedna ay yihiin awood shaqo, aqooneed, hoggaamineed iyo maamulba.[60]

Ka qaybgalayaal badan ayaa ku sifeeyey dhallinyaradu in ay yihiin saameeyayaal arrimaha bulshada, iyadoo nin dhallinyaro ah oo ka tirsanaa warays-kooxeedka 1aad uu caddeeyey in dhallinyaradu yihiin cidda ugu horreysa ee ka jawaabta marka dhibaatooyin dhacaan, iyagoo is abaabula isla markaana fidiya cududda shaqo ee loo baahan yahay si gar gaar deg deg ah loo helo iyagoo sidoo kale ah cidda ugu horreysa ee daryeel ufidisa dadka ku waxyeelooba musiibooyinka sida qaraxyada argagixisada.[61] Sidoo kale, waxay ka qaybgalayaashu si faah faahsan uga hadleen tiro-badnida dhallinyarada iskood shaqo abuur u samaystay, kuwa tadawuca ku shaqeeya iyo weliba hindiseyaasha hoos laga soo bilaabay/bulshada ka soo dhex baxaya ee looga gol leeyahay in lagu taakuleeyo qaybaha bulshada laguna horumariyo aayaha dhaqan-dhaqaale ee bulshada gobolka.[62] Ka qaybgale ka tirsanaa waraysi-kooxeedka 3aad ayaa hoosta ka xarriiqay sida dhallinyaradu ay ugu fooganyihiin/mashquulsan yihiin xallinta qadiyadaha magaalada sida saxmadda jidadka, iyagoo dhaqaale ahaan uga qaybqaata bulshada isla markaana wacyi-gelin ka sameeya arrimaha bulshada.[63] Ka qaybgale kale ayaa isaguna tilmaamay in ay dhallinyaradu safka hore uga jiraan dhaqdhaqaaqyada isbedeldoonka bulsheed, halka ka qaybqaate kale oo ka tirsanaa waraysi-kooxeedka 3aad arrintan la xiriiriyey tusaaliha taariikhiga ah ee dhallinyaradii Leegada (SYL) kuwaas oo lagu ammaano sidii ay bulshada isbedel wanaagsan ugu horseedeen.[64]

Waxay ka qaybgalayaashu adkayeen kaalinta gaarka ah ee dhallinyaradu leeyihiin iyagoo ah jilayaasha iyo saamileeyda maamulka gobolka maadaama uu saldhig u yahay xog ogaalnimo badan u qabaan gobolka. Ka qaybgalayaashu waxay si gaar ah ugu bogaadiyeen dhallinyarada hawlohooda u dhaqdhaqaadidda bulshada, doorkooda waxbarashada, dadaaladooda dib-u-dhiska dalka iyo u qareemiddooda arrimaha xuquuqul insaanka.[65]

58. Focus group 1, YW 8; Focus group 3, YW 1.
59. Focus group 1, YW 8.
60. Focus group 1, YM 3.
61. Focus group 1, YMNOM26; Focus group 3, YW 3.
62. Focus group 1, YW 2; Focus group 3, YM 6.
63. Focus group 3, YW 3.
64. Focus group 2, YW 5; Focus group 3, YM 7.
65. Focus group 3, YM 2; Focus group 2, YM 8 & YW 7.

Marka dhanka amniga laga hadlo, ka qaybgale ayaa xusay doorka dhallinyarada ee maamulka in sare loo qaado si ay ugu dhiganto fahamka ay si gaar ah ugu leeyihiin khilaafaadka kala duwan iyo sababaha keena.[66] Ka qaybgalayaashu waxay tilmaameen kaalinta dhallinyarada kaga jiraan dardar gelinta hindisayaasha dalxiiska dadweynaha, iyadoo loo marayo ciyaaraha iyo banbaxyo waxbarasho oo loo qabto jiilasha da'yarta ah.[67] Ugu dambayn, tiro yar oo ka qaybgalayaasha ka mid ah ayaa xoogga saaray jagooyinka rasmiga ah ee maamulka dawladda kuwaas oo ay haatanba hayaan dad dhallinyaro ah, sida maamulka gobolka, shaqaalaysiinta dawladda hoose, waaxda dib u dhiska magaalada iyo waxbarashada.[68] Ka qaybgalayaashu waxay sidoo kale hoosta ka xarriiqeen miro-dhalka shaqadan ay keeneeyso suurtagalnimada fursado waa weyn oo dhallinyaradu helaan ayna ka qaybqaataan maamulka iyo go'aan-qaadashada.[69]

## 5.2 Caqabadaha xaddidaya ka qaybqaadashada dhallinyarada maamulka ee gobolka Banaadir

Waxaa mar kale ka qaybgalayaasha la weydiiyey in ay xusaan caqabadaha iyo culaysyada dhallinyarada ka haysta ka qaybgalka maamulka. Mawduuca kowaad ee si is daba jog ah loo xusay waxa uu ahaa siyaasadda haybta qabiil ku dhisan ama qabyaaladda, iyadoo intii lagu jiray waraysi-kooxeedyada oo dhan ay ka qaybgalayaashu qabyaaladda iyo tolaysiga si gaar ah ugu aqoonsadeen caqabadaha aasaasiga ah ee hortaagan ka qaybgalka dhallinyarada maamulka maadaama ay madaxdii dawladdu u janjeeraan in ay shaqaalaysiiyaan ama fursad siiyaan dad isla qabiilkooda ah.[70] Arrintani waxay sii joogtaysay nidaam aan tixgelineyn oo dhiirigelineyn doorsoocashada, balse ku dhisan xiriirka shakhsiga ah kaasoo ay sii xoojinayaan jiilashii hore oo aan doonayn in ay la falgalaan ama shaqo siiyaan dadka ka baxsan xayndaabka kooban ee xirfaddooda.[71] Qaar kale oo ka qaybgalayaasha ka mid ahi waxay sheegeen in nadaamka 4.5 ee sababa faquuqa iyo fogeeynta siyaasadeed iyo sidoo kale musuqmaasuq iyo hoggaan taag daran ay dhammaan yihiin kuwo wiiqaya ka qaybgalka dhallinyarada ee maamulka.[72] Sidoo kale, in ka qaybgalayaashu soo xigteen, ka sokow in qabyaaladdu caqabad ku tahay shaqo helidda dhallinyarada, waxay sidoo kale ka sii qayb sii socoshada caddaalad darrada iyo musuqmaasuqa maamulka dhexdiisa ah. Ka qaybgale ayaa xusay in tag/tabar darrada maamulka ay ka sii qaybqaadatay u janjeeridda madaxda dhanka in ay dadka xilalka ugu magacaabaan taageerada ay taliska markaa jooga u hayan darted, iyagoo ka leexda dadka qaarkii sifo aan caqli saxa ku fadhin.[73]

Sifaadkaas waxay ku lug leeyihiin isla xisaabtan la'aanta ka jirta hay'adaha dawladda dhexdooda sida ay tilmaameen ka qaybgalayaashu, iyagoo u aaneeyey tan ineey abuurayso nugaylka/nuglaanta iyo hubanti la'aanta xagga shaqada iyo isku hallayn la'aanta dhallinyarada ee ka qaybgalka maamulka.[74]

66. Focus group 2, YW 2 & YM 9
67. Focus group 3, YM 2 & YM 9.
68. Focus group 3, YW 4, YM 2 & YM 8.
69. Focus group 2, YM 3; Focus group 1, YM 3.
70. Focus group 1, YW 6; Focus group 3, YM 8.
71. Focus group 1, YW 10, YM 4. & YM 11; Focus group 2, YM 8, YW 10, YM 3.
72. Focus group 2, YW 10, & YM 9; Focus group 3, YW 1.
73. Focus group 2, YM 8 & YM 2.
74. Focus group 2, YM 8 & YM 2.

Ka qaybgale ayaa soo xigtay in inta badan mashaaraaciida iyo hindisayaasha loogu talagalay dhallinyarada aaney fulin sababtoo ah isla xisaabtan la'aan iyo musuqa ka dhex jira hay'adaha dawladda.[75] Ka qaybgale kale ayaa isaguna iftiimiyey/bidhaamiyey in ku tagrifalka hantida dadweynaha, iskaashi la'aanta waxyaha dawladda dhexdooda ah iyo hoggaan xumadu ay sabab u noqdeen in dhallinyarada la geeyo xilala aaney aqoontoodi iyo xirfaddeedi toonna lahayn. Taasoo dalka ka lumineeysa aqoon iyo fursado ay ahayd in meelo kale oo ugu habboon looga faa'iideysto.[76] Ka qaybgalayaashu waxay xuseen in aaney jirin fursado lagu xirfadaha iyo tababarro waayo-aragnimo marka la eego shaqo la'aanta maamulka la xiriirta. [77]

Gabadh ka tirsanayd waraysi-kooxeedka 1aad waxay tiri:"dhallinyarada dalka gudihiisa wax ku baratay ee khibraddoodu yartahay waxaa laga yaabaa in loo sheego in aan la shaqaalaysiin Karin" ayadoo tilmaantay in ay jirto garawshiyo la'aan ku saabsan iswaafaq la'aanta ka jirta waxbarashada dhallinyarada iyo fursadaha shaqo oo dhanka shaqo bixiyeyaasha iyo dhinaca dawladdaba ah.[78] Ka qaybgale kale ayaa tayada waxbarashada oo liidata iyo fursadaha oo yar ku sababeeyey in ay yihiin kuwo xaddidaya maanka iyo hal-abuurka dhallinyarada, taasoo hoos u dhigeeysa/yarayneeysa wax ku biirintooda maamulka iyo dhismaha dawladnimada mustaqabalka fog.[79] Gabadh ayaa ayana sheegtay in dhallinyaradu guul darrooyinka ay kala kulmeen arrimahaas awgood ay duruuftu ku khasabtay in ay dalka ka baxaan/socdaalaan iyagoo waddamo kale ka baadi goobaya fursado waxbarasho iyo shaqo.[80] Ka qaybgalayaashu sidoo kale waxay u aqoonsadeen amni darrada, cadaadiska bulshada iyo kala sooca in ay yihiin caqabado ka hortaagan dhallinyarada eek ka qaybgalka maamulka. Ka qaybgale ayaa yiri: "gabdhuhu waxay la kulmaan caqabado u goonni ah gaar ahaan marka ay raadinayaan xilal sar sare iyo jagooyin saameeyn leh," Waxaanu intaa ku daray in kala sooca iyo tacaddiyada jinsiga ah ay qayb ka yihiin isu dheelitir la'aanta awoodeed oo keenaya six un uga faa'iideysi lagula kaco gabdhaha.[81] Ka qaybgale kale ayaa iftiimiyey sida dumarka looga horjoogsado xilalka, waxkasta ay heerka aqoontooda ama khibraddoodu tahayba, sababo la xiriira liididda haweenka iyo siyaasadaha qabiilaysa. Waxaanu tilaamay in qoondada matalaadda haweenka golaha barlamaanka ee 30% aan sidii loogu talagalay loo fulin.[82] Ka qaybgalayaashu sidoo kale waxay qireen in ay aragtiyo qaldan iyo cadaadis dhanka waalidka iyo oday dhaqameedyada ah oo looga weecinayo dhallinyarada ka qaybgalka maamulka.[83] Ugu dambayn, ka qaybgalayaashu waxay si faah faahsan u sheegeen sida cadaadiska bulshada ay ugu sii darsameen amni darrada iyo rabshadaha, siiba khataraha uga imanaya dadka xilalka ka haya dawladda/maamulka dhanka argagixisada iyo burcadda deegaanka ahba.[84]

75. Focus group 2, YW 5.
76. Focus group 2, YM 9.
77. Focus group 2, YM 10; Focus group 1, YW 10.
78. Focus group 1, YW 10.
79. Focus group 3, YM 7.
80. Focus group 2, YW 6.
81. Focus group 2, YW 7.
82. Focus group 1, YW 10.
83. Focus group 2, YM 9 &YM 4.
84. Focus group 2, YM 9, YM 2 & YM 8; Focus group 3, YW 6, YM 7 & YW 5.

## 5.3 Xalalka caqabadaha dhallinyarada ka haysta ka qaybgalka maamulka gobolka Banaadir

Markii laga hadlayey tilmaamidda xalalka caqabadaha xaddidaya ka qaybgalka dhallinyarada ee maamulka, waxaa soo baxay/shaac baxay labo mawduuca oo kala ah: isla xisaanka iyo garab-siinta dhallinyarada. Waxay ka qaybgalayaashu u qareemayeen in la qaato hanaanka/nadaamka shaqaalaysiinta eek u salaysan doorsoocashada iyo in meesha laga saaro siyaasadda ku dhisan haybta qabiil ee haatan wax lagu shaqaalaysiiyo.[85] Si loo dhimo/buuxiyo gaabka u dhexeeya dadaalada dawladad, mid ka mid ah ka qaybgalayaashu xuxuu soo jeediyey in la sameeyo siyaasado iyo istaratiijiyado dawladeed oo dhallinyarada ka qaybgelinaya maamulka si loo xaqiijiyo dabagal lagu sameeyo mashaariicda la doonayo in dhallinyarada lagu taageero.[86] Ka qaybgale ka tirsanaa waraysi-kooxeedka 2aad Waxa uu ku baaqay in la doorto hoggaan u qalma xilka ayna ka go'antahay in uu horumariyo bulshada uuna sameeyo bay'ad ka gaybgalka dhallinyarada ee maamulka hortabinta leedahay.[87]

Qaar kale oo jawaabaha ka qaybgalayaasha ka mid ah waxay iyaguna diiradda saareen in dhallinyarada fursado loo abuuro iyo in la horumariyo xiriirka bulshada kaasoo ka qaybqadanaya xallinta dhibatooyinka bulshada eek a jira gobolka Banaadir. Ka qaybgale kale ayaa u rakay/aqoonsaday xiriirka bulsheed in uu yahay dareen masuliyad wadareed oo ku dhisan dareen Alle ka cabsi iyo haysashada/ku dhaqanka qiyamka anshaxa wanaagsan ayagoo fulinaya masuuliyaddooda ummadeed.[88] Arrintaas dhamaystirkeedu wuxu noqonayaa in dhallinyaradu ka qaybgalaan goobaha go'aan-gaarista si ay wax ugu kordhiyaan una qaabeeyaan ka qaybgalkooda maamulka.[89] Ugu dambayn, waxay ka qabgalayaashu u doodeen sidii dhallinyarada fursado waxbarasho iyo shaqo loogu abuuri lahaa iyo sidoo kale in ay dawladdu taageerada ku habboon dhallinyarada siiyo, taasoo hortabinta siineeysa baraaraha dhallinyarada iyo mustaqbalkooda.[90]

# 6. Qeexidda dawlad-dhiska ee gobolka Banaadir

Marka laga hadlayo qarannimada, ka qaybgalayaashu waxay kaalinteeda dawlad-dhiska ku sifeeyeen in uu u taagan yahay haybta iyo wada ahaanshaha koox kuwaasoo leh dan guud, hal isir ah iyo/amah al sawrac wadaaga.[91] Ka qaybgale ayaa yiri: "haddii aan qaran jirin, ummdina ma jirto…waayo ma taqaanid cidda aad tahay", taasoo muujineeysa muhiimadda ay leeyihiin dhismaha dawladnimada iyo haybta qaran.[92] Ka qaybgalayaal kalena waxay xoogga saareen muhiimadda aqoonsiga caalamiga ah iyo xiriirka ay la leedahay fikradda qanannimada/qawmiyadnimada. Ka nin dhallinyaro ah oo tirsanaa waraysi-kooxeedka 1aad ayaa Waxa uu isku xiray dhisidda haybta qaran iyo aqoonsiga dibadda, halka mid kalena ku micneeyey/tilmaamay tartanka ka dhex jira dhaqaalaha adduunka mid jaan-goynaya dawlad-dhiska.[93]

85. Focus group 1, YW 6; Focus group 3, YW 3, YW 5 & YW 1.
86. Focus group 2, YW 5.
87. Focus group 2, YW 10.
88. Focus group 2, YW 6.
89. Focus group 2, YW 10 & YM 4.
90. Focus group 2, YW 6; Focus group 3, YW 3; Focus group 1, YW 5.
91. Focus group 1, YW 10, YW 5, YW 11.
92. Focus group 1, YW 5.
93. Focus group 1, YM 1 & YM 4.

Marka la eego qeexidda dawladda, waxay ka qaybgalayaashu soo bandhigeen mabaadi'da dawladda lagu dhiso kuwaas oo ay ka mid yihiin isku-filnaanta, dastuurka, wada-ogolka bulshada ee dawladnimada, eex la'aan, caddaalad iyo ilaalinta danta dadweynaha.[94] Ka qaybgale kale Waxa uu sharaxay sida tayada hay'adaha ay muhiim ugu yihiin dhismaha dawladda, gaar ahaan baarlamaanka, laanta fulinta iyo hoggaamiyeyaasha siyaasadeed ee hay'adahaas ku leg leh.[95] Guud ahaan waraysi-kooxeedyada ka qaybgalayaashu waxay isla qireen in maamulku lagama maarmaan u yahay in la helo dawlad shaqaysa, iyadoo nin dhallinyaro ahina siiraacshey: "taasi waxay lama huraan u tahay dhismaha bulsho xasilloon oo barwaaqo ah."[96] Marka laga hadlo dhaqan-gelinta dawlad-dhiska, waxay ka qaybgalayaashu xoogga saareen siyaasadaha, hoggaan adag oo daacad ah, hay'ado dawladeed oo tayo/waxqabad leh iyo sarreeynta sharciga. Waxayna ka qaybgalayashu si gaar ah u xuseen horumarinta qaranka, dhawrista khayraadka/hanida qaranka, horumarinta kaabayaasha iyo hababka dhaqan-dhaqaale iyo weliba ilaalinta nidaamka bulshada, kuwaas oo ahujeeddooyinka aasaasiga ah ee qeexitaannada dawlad-dhismka.[97] Ka gaybgale ayaa ku tilmaamay wadajirka bulshada dhismaha xiriirada caalamiga ah in ay yihiin guulo waa weyn oo dal gaaro.[98] Qaar badan oo ka qaybgalayaasha ka mid ahi waxay qeexeen dawlad-dhiska iyagoo u maraya awood-siinta muwaadiniinta iyo horumarinta habka nolosha madaniga ah. Tiro kale oo tirsan ka qaybgalayaashu waxay diiradda saareen dadaal wadareedka dawladda iyo jilayaasha kale ee ku aaddan horumarinta bulshada iyo heerka nolosheeda.[99] Kuwa kale waxay iftiimiyeen muhiimadda ay leedahay in dhammaan qaybaha bulshadu helaan matalaad siyaasadeed, taasoo markaa sahleeysa in ay dawladdu bixiso adeegyadii dadweynaha, sida waxbarashada, amniga iyo halbeegyada dhaqaale ee lagu xaqiijinayo baahiyaha dadweynaha.[100]

Hal ka qaybgale ayaa sheegay in macnaha dawlad-dhisku yahay: "in ardayda soo qalinjebisa shaqo la siiyo".[101] Mid kale isaguna Waxa uu tilmaamay in ay tahay dawladdu ineey abuurto koboc dhaqaale, ammaanka sugto, waxbarashada fududayso ayna daboosho baahiyaha aasaasiga ah sida cuntada.[102] Nin dhallinyaro ah oo ka tirsanaa waraysi-kooxeedka 1aad ayaa sheegay in dhismaha dawladnimda ay tahay in diiradda lagu saaro ilaalinta diinta iyo dhaqanka gaar ahaanna dhawrista qaab-dhismeedka qayska.[103] Mid kale Waxa uu taabtay/xusay dhawrista xuquuqda iyo xorriyadda muwaadiniinta, halka gabadh ayaa ayana tiri: "ilaalinta hantida muwaadinka waa waxa uu dhismaha dawladnimadu aniga iiga dhigan yahay."[104]

## 6.1 Doorka ay dhallinyaradu ku leeyihiin dawlad-dhiska

Dhammaan ka qaybgalayaashu waxay u aqoonsadeen dhallinyarada in ay yihiin cudud-shaqo maadaama ay guud ahaan bulshada ka yihiin 70%.[105] Ka qaybgale ayaa yiri: "dhallinyaradu waa lafdhabarta bulshada…waxa kaalintooda ka mid dib u dhiska magaalada, jidadka iyo horumarinta deegaanka.[106]

94. Focus group 2, YW 5 & YM 4; Focus group 1, YW 10.
95. Focus group 2, YM 2.
96. Focus group 2, YM 8, YM 1, YW 6 & YM 9; Focus group 1, YM 4.
97. Focus group 1, YW 6, YM 2, YW 10, YW 5.
98. Focus group 2, YM 4; Focus group 1, YW 1.
99. Focus group 1, YW 5, YM 3 & YW 6.
100. Focus group 2, YW 6 & YM 1; Focus group 1, YM W.
101. Focus group 1, YW .
102. Focus group 1, YM 1.
103. Focus group 1, YM 3.
104. Focus group 2, YW 6; Focus group 1, YW 6.
105. Focus group 3, YW 1 & YW 5.
106. Focus group 3, YW 1.

Ka qaybgale kale ayaa intaa ku daray in dhallinyaradu ka dhex muuqdaan bulshooyinkooda ayagoo xilal/jagooyin ka haya ciidanka militariga, booliiska iyo (laamaha) dawladda.[107] Ka qaybqaate kale ayaa xusay maadaama ay dhallinyradu yihiin tirada ugu badan ee bulshada, waxay qayb muhiim ah ka qaataan waaxyaha lafdhabarta u ah bulshada sida caafimaadka iyo waxbarashada.[108]

## 6.2 Caqabadaha hortaagan in dhallinyaradu ka qaybgasho maamulka

Markii ka qaybgalayaasha la warsaday in ay taxaan caqabadaha hortaagan ka qaybgalka dhallinyarada, walaacooda ugu wayn waxa uu ahaa dhanka amniga gobolka.[109] Ka qaybgale ayaa sheegay in, si ka duwan saraakiisha sare ee dawladda, dhallinyarada jagooyinka dawladeed hayaa aaney awoodi karin ama u fududayn in ay kireeystaan ilaalo gaar ah, taasoo xaddideeysa ka qaybgalkooda shaqooyinka dawladda.[110] Ka qaybgale kale ayaa carrabka ku adkeeyey in musuqmaasuqu yahay caqabad, asagoo soo xigtay dhacdada saraakiil booliis ah oo laaluush ka qaada dadka oo adeegsanaya xuquudooda.[111] Qaar kale waxay u aaneeyeen caqabadaha ugu waa weyn ee dhallinyarada ka hortaagan ka qaybgalka dhismaha dawladnimada isla xisaabtan la'aanta dawladda ka dhex jirta iyo taag yarida maamulka gobolka Banaadir. Nin dhallinyaro ah ayaa tilmaamay in aan wax xiriir ahi ka dhexayn nidaamka maamul iyo bulshada, asagoo yiri: "nidaam maamul oo la taaban karo kama jiro gobolka Banaadir marka laga soo bilaabo heer degmo."[112] Qaar kalena waxay ku sababeeyeen gaaritaan la'aanta dhallinyarada ee maamulka. Sida ay sheegtay gabadh ka mid ahi, "nidaamka dawladdu ma door bidayo dhallinyarada, nidaamka qandaraas bixintu kuma salaysna tartan furan oo loo siman yahay."[113]

Marka laga hadlayo xalalka, ka qaybgalayaashu waxay inta badan u doodeen sidii heli lahaa isla xisaabtan xooggan, xoojinta amniga iyo ka qaybgelinta dhallinyarada ee maamulka.[114] Sida uu qabo nin dhallinyaro ahi, "xalku Waxa uu ku jiraa in la helo nidaam iyo kala dambayn si markaa dadku isula xisaabtamaan."[115] Ka qaybgale kale ayaa sheegay in amniga dhammaan degmooyinka la xoojiyo si ay dhallinyarada maamulka ku jiraa u dareemaan ammaan ay shaqadooda ku gutaan."[116] Marka la eego isku xir la'aanta bulshada laga oo bilaabo heer degmo, ka qaybgale ayaa ku taliyey in maamulka la daadejiyo ilaa heer degmo."[117] Ugu dambayn, nin dhallinyaro ah ayaa soo jeediyey in ka qaybgelinta dhallinyarada xoogga lagu saaro fursadaha shaqo ee ka dhex jira maamulka gobolka Banaadir si loo xoojiyo ka qaybqaadashada dhallinyarada ee dhismaha dawladnimada.[118]

107. Focus group 3, YM 2.
108. Focus group 3, YW 5.
109. Focus group 3, YM 7 & YM 2.
110. Focus group 3, YM 2.
111. Focus group 3, YM 6.
112. Focus group 3, YM 7.
113. Focus group 3, YW 1.
114. Focus group 3, YW 6, YM 2, & YM 8.
115. Focus group 3, YM 5.
116. Focus group 3, YM 2.
117. Focus group 3, YM 7.
118. Focus group 3, YM 8.

# 7. Qeexidda khilaafaadka gobolka Banaadir iyo sida looga hortagi karo

Markii ka qaybgalayaasha la waydiiyey in ay qeexaan khilaafaadka, jawabohoodu waxay inta badan ku soo celceliyeen in siyaasadda haybta qabiil ku salaysan ay dabka ku sii shiddo isku-dhacyada iyo rabshadaha. Sidoo kale waxaa jirey dareen guud dhammaan waraysi-kooxeedyada oo ah in sababaha yar yar ee khilaafaadka gobolka ay sii huriyaan khilaafaadka qabaliga ahi. Ka qaybgale ka tirsanaa waraysi-kooxeedka 2aad Waxa uu xusay in khilaafaadka qabaliga ahi ay halista ugu weyn ku hayaan deganaanshaha bulshooyinka ayadoo sababta rabshado iyo barakac bulsho.[119] Ka qaybgalayaal kale markeey qeexayeen 'khilaafaad'waxay carrabka ku adkeeyeen khilaafaadka qabaa'ilka dhexdooda ah ee ku dhisan koox-nacaybka iyo murannada taariikhiga ah ee ku saabsan dhul/deegaan iyo khayraad.[120] Sida uu qabo nin dhallinyaro ahi, arrimaha ka dhasha khilaafaadka qabaliga ah waa adagtahay in la xalliyo sababtoo ah waxaa jira sinnaan la'aan iyo musuqmaasuq ku lug leh matalaadda qabiil ee maamulka dhexdiisa ah.[121] Ka qaybgalayaasha qaarkood waxay soo hadal qaadeen colaadda ka socot Laascaanood oo u dhexeeysa "Ciidanka Qaranka ee Somaliland" iyo xoogag ciidan beeleed reer Laascaanood ah, colaaddaas oo qayb ahaan ku salaysan muran xagga khayraadka ah.[122]

Ghabadh ka titsanayd waraysi-kooxeedka 3aad ayaa samaysay isku xir xiiso leh oo u dhexeeya khilaafaadka bulsheed iyo kuwa siyaasadeed, ayadoo ku sifeeysay in khilaafaadka siyaaadeed ka soo farcamaan musuqmaasuqa oo ay shidaalkana ku shubaan loolanka/herdanka awoodda.[123] Ka qaybgale kale ayaa ku dooday in gunta ay khilaafaadka ka soo unkamaan ay salka ku hayso qaladaad ka jira dhanka nidaamka federaalka ah iyo maqnaashaha maamul waxqabad/waxtar leh heer qaran iyo heer gobolba.[124] Nin dhallinyaro ah oo ka tirsanaa waraysi-kooxeedka 1aad ayaa u aaneeyey khilaafaadka la'aanta hay'ado dawladeed oo waxtar leh, asagoo carrab ku adkeeyey in isla xisaabtan la'aanta ka jirta nidaamka caddaaladda dhexdiisa ay keentay/sababtay in lagu tiirsanaado hababka qabiilka ku dhisan ee xallinta khilaafaadka bulshada dhexdeeda ah.[125]

Waxay jawaabuhu ka tarjumayaan kalsooni darro baahsan oo laga qabao nidaamka maamul/dawladnimo, ayagoo khilaafaadka ku fasiraya in ay sal u tahay maqnaanshaha awood lagu kalsoonyahay oo dadka u garsoorta. Waxa uu magnaanshaha dawladdu saameeyn ku yeeshay adeegga dadweynaha, kaabayaasha iyo dadaaladii looga gol lahaa yaraaynta saboolnimada iyo culaysyada dhaqaale, taasoo sii joogteysay khilaafaadka. Guud ahaan waraysi-kooxeedyada ka qaybgalayaashu waxay xoogga saareen culaysyada iyo saamaynaha bulsheed iyo deegaan ee abuuraya isku khilaafaadka ugana sii daraya nuglaanta gobolka ka jirta.

119. Focus group 2, YM 6.
120. Focus group 1, YM 1 & YW 10; Focus group 2, YM 6.
121. Focus group 2, YM 6.
122. Focus group 1, YW 10; Focus group 3, YM 8.
123. Focus group 2, YW 8.
124. Focus group 2, YM 1.
125. Focus group 1, YM 2.

Falcelinta/jawaabaha ka qaybgalayaashu waxay si weyn diiradda u saareen sida abaaruhu ay u sababaan colaado ku salaysan biyo iyo deegaan dhul beereed ah ama meel xoolahu daaqaan, taasoo carqaladaysa noloshii dhulkaa miyiga ah kicisana khilaafaad horay u jirey oo u dhexeeyey kooxo oo ku salaysan hayb qabiil ama kooxaysi siyaasadeed.[126] Ka qaybgale ayaa ku eedeeyey matalaad la'aanta siyaasadeed iyo ka fogeeynta/faquuqa hannaanka go'aan-gaarista in ay keenayaan/sababayaan colaadaha soo noqnoqda, asagoo si gaar ah u tilmaamay in isku day la'aanta in laga jawaabo baahiyaha bulshada deegaanka ee maamul ay keeneeyso in khayraadka layku dagaalo.[127] Arrimaha kale ee khilaafka sii kiciya ee xagga maamulka oo laga dooday waxaa ka mid ah: ku tagrifalka khayraadka, caddaalad darrada xagga dakhliga iyo shaqo la'aanta.[128]

Qeexitaannada qaar ka mid ah ka qaybgalayaashu waxay isla xiriiriyeen amni darrada qaran iyo khilaafaadka oo isdhamaystiraya, ayadoo isha lagu hayo wadiiqooyinka iyo saansaanta guud ee rabshadaha bulshooyinka ka dhex dhaca. Ka qaybqaatayasha cilmibaaristu waxay hoosta ka xarriiqeen labada kooxood oo waa weyn ee amni darrada geeysta/fuliya oo kala ah: ciyaal weero iyo ururka argagixisada ah ee alshabaab, kuwaas oo kala duwan balse leh sababo isku mid ah oo colaad/rabsho heerqaran iyo heerarka ka hooseeyaba.[129] Ka qaybgale ayaa xusay in xakamaynta hubku ay tahay caqabad gaar ah oo haysata caasimadda Muqdisho, waayo, maadaama aanu nadaamsanayn, haysashada hubka iyo isticmaalkiisu waxay si joogto ah u huriyaan iska hor imaadyo hubaysan oo rabshad wata.[130] Mid kale ayaa sheegay sida lacagaha baadda ah iyo musuqmaasuqa laamaha amaanka ka dhex jira uu uga sii qaybqaato nabadgelyo xumada ay dareemayaan dadka ku dhaqan gobolka Banaadir, iyadoo ardayda iyo dadka iskood ushaqaysta sida bajaajleyda ay yihiin kuwa ugu badan oo dhibbanaha u ah arrintan.[131] Shaqo la'aanta iyo caddaalad darrada xagga dakhliga ah waxay sii xoojiyaan musuqmaasuqa ka dhex jira laamaha amniga waxayna ka qaybqaataan sare u kicidda heerka fal-dembiyeedyada geeystaan ee gobolka.[132]

Marka laga hadlo ka hortagga khilaafaadka/colaadaha, jawaabaha ka qaybgalayashu waxay inta ugu badan ku dul wareegayeen maamulka iyo baahida loo qabo in la helo faragelin/gacan dawladeed oo waxtar leh.[133] Arrintan waxay ku salaysan tahay arragti loo dhan yahay oo ah in khilaafaadku mijoxaabiyaan horumarka qaranka ayna sii kiciyaan faquuqa isir iyo dhaqan-dhaqaale.[134] Waxay ka qaybgalayaashu xoogga saareen baahida loo qabo daah-furnaan iyo isla xisaabtan maamulka dhexdiisa ah, gaar ahaanna si loo xoojiyo kalsoonida lagu qabo nidaamka dawladnimo.[135] Dawladdu waa in ay qaadata doorkeeda ah xaakim/garsoore dhex dhexaad ah oo caddaalad ah si ay u samayso hannaan nadaamsan oo ka hortagga iyo xallinta khilaafaadka ayadoo loo marayo hay'adaha dawladda.[136] Markaa kadib, murannada dhulka iyo khayraadka loogu xalliyo hannaanka nidaamka garsoorka si xaqsoor loo gaaro, loona yareeyo ku tiirsanaanta hababka qabiilka ku dhsisan.[137]

126. Focus group 3, YW 5; Focus group 1, YW 10 & YM 3.
127. Focus group 2, YM 11.
128. Focus group 3, YW 1; Focus group 1, YM 3.
129. Focus group 3, YW 1, YW 3 & YM 8.
130. Focus group 1, YW 9.
131. Focus group 3, YW 5 & YM 6.
132. Focus group 3, YW 6 & YW 1.
133. Focus group 1, YM 2, YM 4, YW 10 & YM 3; Focus group 2, YM 11 & YM 6.
134. Focus group 1, YW 10.
135. Focus group 1, YM 2; Focus group 2, YM 11.
136. Focus group 1, YM 2.
137. Focus group 1, YM 2.

Waxay ka qaybqatayaashu isku xireen daadejinta maamulka iyo hirgelinta hannaan maamul oo loo dhan yahay oo muhiim u ah ballaarinta ka qaybgalka siyaasadeed iyo hababka go'aan-gaarista iyo ka hortagga khilaafaadka.[138] Marka talada laga qaybgeliyo daneeyayaasha maxalliga ah lana dhiirigeliyo in horumarka in hoos laga soo bilaabo ayadoo loo marayo maamulka, waxaa dawladda u suurtagelaya in ay xalliso gunta hoose ee khilaafaadka ayna ka jawaabto baahiya kala duwan ee bulshada qaybaheeda. Ka qaybgaleyaal badan waxay u doodeen in la yareeyo siyaasadda qabiilaysan iyo[139] qabyaaladda si loo dhiirigeliyo sinnaan xagga matalaadda siyaasadeed ah. Nin dhallinyaro ah ayaa si cad u xusay in arrintani u baahan tahay in la baabi'yo/la tirtiro nidaamka awood-qaybsiga qabiilaysan ee 4.5 ka.[140]

Qaar kale oo ka qaybgalayaasha ka mid ahi waxay tilmaameen waxbarashada, ka qaybqadashada bulshada iyo wax wada-qabsigu in ay yihiin wadiiqooyinka ka hortagga khilaafaadka iyo horumarka. Ka qaybgale ayaa sheegay in ay waxbarashadu tahay waddada loo marayo samaynta istaratiijiyadaha xallinta khilaafaadka iyo xiriirada bulshada, halkaas oo lagu faafiyo muhiimadda wadaagga dhulka iyo khaayraadkiisa iyo weliba farsamooyinka daminta xasaradaha iyo barashada dhaqanka nabadda.[141] waxaa kaloo la asteeyey ka qaybgalka dhallinyarada iyo bulshada ee kor u qaadid midnimada iyo wax wada-qabsiga si looga hortago colaadaha, iyadoo uu ka qaybgale adkeeyey baahida loo qabo sare u qaadidda wacyiga bulshada.[142] Waxaana taas lagu gaari karaa ayadoo loo marayo dhiirigelinta dood dhex marta jiilasha kala duwan iyo qabiilada kala duwan oo wax looga qabanayo asbaabta gun-dhigga u ah khilaafaadka laguna dejinayo xalal ku habboon ee xilliga fog ah.[143] Intaas waxaa dheer, ka qaybgalayaashu waxay xuseen in wada xaajoodyada nabaddu yihiin istaratiijiyad amni iyo sidoo kale ka hortagga colaadaha si guud aahneed, ayadoo ka qaybgale kale u dooday in la adeegsado farsamooyinka/qaababka xallinta khilaafaadka ee dhaqanka iyo sooyaalka waafaqsan, sida wada xaajoodyada nabadda ee geedka salkiisa ku qabsooma.[144]

## 7.1 Doorka dhallinyarada ee ka hortagga colaadaha ee gobolka Banaadir

Guud ahaan ka qaybgalayashu waxay ku jawaabeen in habka ugu waxtarka badan ee dhallinyarada loogu caawin karo ka hortagga khilaafaadka uu yahay kor u qaadidda wacyigelinta. Ka qaybgale ayaa u dooday in ay helaan ka qaybgal toos ah ee hannaanka doorashooyinka, Waxaanu carrabka ku xoojiyey in ay muhiim tahay in la helo dhallinyaro aqoon leh oo u midowda si ay u waajahaan arrimaha ka hortagga iyo xallinta khilaafaadka.[145] Ka qaybgale kale ayaa soo jeediyey in la aasaaso group/koox dhallinyaro ah oo u ololeeya sidii loo horumarin lahaa nabadda loogana hortegi lahaa rabshadaha asagoo sii xoojiyey qiimaha/muhiimadda ay leedahay in dadaallada hadda socda wax lagu dul dhiso.[146]

138. Focus group 2, YM 11; Focus group 3, YM 7.
139. Focus group 2, YM 11.
140. Focus group 2, YM 6, YM 11 & YM 1.
141. Focus group 1, YM 3.
142. Focus group 1, YW 10, YM 3 & YM 1.
143. Focus group 1, YM 1.
144. Focus group 3, YW 5 & YM 2.
145. Focus group 2,YM 5.
146. Focus group 2, YM 1.

Waxaa inta badan la soo jeedshey in baraha bulshada loo adeegsado dhanka wacyigelinta dhallinyarada. Ka qaybgalayaashu waxay carrabka ku adkeeyeen sida madalaha baraha bulshada loogu horumarin karo nabadda looguna baahin karo aqoonta ku saabsan ka fogaanta rabshadda.[147] Ka qaybgale ayaa ku dooday in la mamnuuco/xiro aaladda tik tok ga, isagoo u aaneeyey kaaliteeda hurinta khilaafaadka dhallinyarada dhexdooda ah.[148]

Ka qaybgale kale ayaa soo jeediyey in ka qaybgalka dhallinyarada wacyigelinta ku saabsan xiriirka ka dhexeeya isticmaalka maandooriyaha iyo rabshadda uu ahaa mid muhiim ah, iyadoo xoogga la saaray sidii dhallinyarada loo bari lahaa cawaaqibta xun ee isticmaalka maandooriyaha.[149] Qaar kale oo ka qaybgalayaasha ka mid ah ayaa ku dooday in la sameeyo banbaxyo iyo tallaabooyin wax looga qabanayo isticmaalka daroogada, isagoo sheegay in helidda waxbarasho fiican iyo fursado caafimaad ay qayb ka qaadan karto ka hortagga khilaafaadka dhallinyarada dhex mara. Ka qaybgale Waxa uu ku taliyey in taas lagu gaaro iskaashi u dhexeeya dhallinyarada iyo laamaha fulinta sharciga si wax looga qabto arrimaha daroogada la xiriira.[150] Waxay ka qaybgalayaashu hoosta ka xarriiqeen muhiimadda fududaynta fursdaha shaqada taasoo noqon karta ka hortag. Waxay adkeeyeen in kasbashada dhallinyarada xirfadaha iyo khibradaha loo baahan yahay ay u suurtagelineyso in ay ku guuleeystaan xirfado shaqo, iyagoo markaa ka qaybqadanaya koboca dhaqaalaha, horumarka bulshada, yaraynta saboolnimada, wadajirka bulshada iyo danta guud ee bulshada.[151]

Ka qaybgale ayaa carrabka ku xoojiyey in loo baahan yahay waxbarasho si loo doorto loona dheerigeliyo hoggaamiyeyal tayo leh, lana dhiirigeliyo wada noolaansho nabaddeed gaar ahaan kuwa dhanka rabshadda u janjeera.[152] Mid kale ayaa sheegay in dib looga fiirsado fikradda ah “waxaad tihiin madaxdii berri”, asagoo ku dooday inay tahay in kaalinta dhallinyarada ee xilligan la aqoonsado lagana qaybgeliyo hannaanka go’aan-gaarista. Waxay wada xoojiyeen in hortabinta la siiyo waxbarashada dhallinyarada iyo awood-siintooda si aqoontooda fursadohooda/awoodooda loogaga faa’iideysto dhanka isbedelka wanaagsan.[153] Ka qaybgalayaashu waxay qireen tiro caqabado ah kuwaas oo xannibaya awoodda dhallinyarada iyo ka qaybgalkooda hindisayaasha ka hortagga khilaafaadka. Ka qaybgale ayaa xusay sida dawladdu dhallinyarada karaankooda hoos ugu dhigto, codkooda dhegaha looga furaysto fursadohoodana/awoodohooda aan loo tigelin.[154] Ka qaybgale ayaa adkeeyey in liididda dhallinyarada ay uga sii dartay iyagoo aan haysan joornaallo ay fikirkooda ku cabbiraan. Ka qaybgal la’aanta dhallinyarada ee hannaanka go’aan-gaarista iyo liidashada mataaladda siyaasadeed Waxa uu ahaa walaac kale oo jirey. Mataalad la’aantani waxay muujineysaa mawduuc ballaaran oo u baahan faham qoto-dheer iyadoo matalayaasha dhallinyarada aan si saxa loo tixgelin. Hay’adaha qaar waxay ku guul darraysteen in ay dhallinyaro ka qaybgaliyaan, iyagoo taas bedelkeeda xoogga saara haybta qabiil taasoo sii siyaadineysa faquuqii dhallinyarada.[155]

147. Focus group 1, YM 3.
148. Focus group 3, YW 3.
149. Focus group 1, YW 11.
150. Focus group 3, YW 4.
151. Focus group 1, YW 7.
152. Focus group 1, YW 5.
153. Focus group 2, YM 1.
154. Focus group 2, YM 11.
155. Focus group 2, YW 8.

Ka qaybgale ayaa xusay in xaddidnaan helitaanka waxbarasho tayo leh iyo fursado dhaqaale ay caqabada ka mid yihiin.  Taasina waxay ka dhigtay ku tiirsanaadan dad jagooyinka sare jooga awoodoodi in ay ayagu soo bullaalan baraaraan shakhsiyaad ahaan iyo bulsho ahaanba ay koobantay.[156] Ka qaybgale ayaa tilmaamay in dhallinyarada inta badan si aan caddaalad ahayn loogu arko dad aan masuul ahayn, asagoo xoojiyey in loo baahan yahay isu dulqaadasho ka dhexeyeeysa dhallinyarada iyo facyaasha ka waa weyn si codka dhallinyarada loo dhegeeysto loona tixgeliyo.[157]

Sidoo kale ka qaybgalayaashu waxay tilmaameen dhawr arrimood oo dhallinyarada u diidan ka qaybgalka hindisayaasha ka hortagga khilaafaadka. Dhibaatada ugu weyn ee ka qaybgalayaashu la xuseen waxay ahayd in aan dhallinyaradu si fiican ugu diyaarsanayn xallinta khilaafaadka, taasoo ay u aaneeyeen fursado tababr la'aantood. waxayna soo jeediyeen in dhallinyarada laga qaybgeliyo dadaalada xallinta khilaafaadka si ay odayaasha wax uga bartaan iyadoo xoogga la saarayo kala dhaxlidda aqoonta ee jiilasha. Haddaba ayadoo la xoojinayo isu gudbinta aqoonta ee jiilasha kala duwan, waxay ka qaybgalayaashu ku taliyeen in la helo istratiijiyad ku salaysan ka qaybbgelinta dhallinyarada ee dadaalada xallinta khilaafaadka si ay habkaa wax ugu bartaan.[158] Ka qaybgale kale Waxa uu tilmaamay in mid ka mid ah caqabadaha ugu waaweyn ee dhallinyarada haysta ay tahay awooddii maamul oo ku kooban gacanta Maamulka Gobolka Banaadir. Isagoo soo jeediyey in hannaanka maamulka la daadejiyo iyadoo ay ujeeddadu tahay awood-qaybsi ballaaran iyo dhiirigelinta ka qaybgalka dadka deegaanka ah.[159]

Ka qaybgale ayaa tilmaamay/identified caqabado dhawr ah dhallinyarada ka hortaagan ka qaybgalka ka hortagga khilaafaadka sida fursado ka qaybgalka hannaanka go'aan-gaarista l'aantood iyo aqoon qumman/ku habboon iyo karti la'aan. Ka qaybgalayaashu waxay soo jeediyeen in la sameeyo/abuuro bay'ay soo jiidata/dhowrysa dhallinyarada, iyadoo iyagana la siinayo aqoonta/xogta iyo xirfadaha ay u baahan yihiin si ay si wanaagsan uga qaybqaataan barnaamijyada ka hortagga colaadaha.[160]

Ka qaybgale kale Waxa uu ka hadlay faham darrada xagga dhaqanka ah eek a hortaagan dhallinyarada ka qaybgalka ka hortagga colaadaha. Waxa uu ka qaybgalahaasi xoogga saaray fikradda ah in dadka waa weyn oo kaliya ay aqoon iyo waayo-aragnimo leeyihiin oo aan looga maarmi Karin in ay talooyin wax ku ool ah bixiyaan. Fikraddan qaldan waxay dhallinyarada ka hor istaageysaa ka qaybgalka dadaalada looga hortagayo colaadaha, waxayna xoojineysa is riixidda da'da ku dhisan. Wxuu ka qaybgaluhu taageeray muhiimadda fikirka dhallinyarada iyo in loo sameeyo madallo ay jiilasha kala duwani ku xiriiraan iskuna kaashadaa.[161]

156. Focus group 2, YM 9.
157. Focus group 3, YM 2.
158. Focus group 3, YM 5.
159. Focus group 3, YM 7.
160. Focus group 1, YM 2.
161. Focus group 1 YW 10.

# 8. Lafagurid

Saddex qodob oo la xiriira maamulka iyo hoggaaminta ayaa ka soo baxay xogtii la ururiyey, kuwaas oo kala ah: a) xiriirka ka dhexeeya maamulka iyo hoggaaminta, b) habraacyada iyo istratiijiyadaha ay tahay in hoggaamiyeyaasha lagu doorto ama xusho iyo t) astaamaha sifeeynaya hoggaamiyaha waxtarka leh.

Marka kowaad, dhallinyaradu waxay iftiimiyeen xiriirka ka dhexeeya maamulka iyo hoggaaminta, iyagoo xoogga saaray in midba midka kale xoojiyo. Waxay ku doodeen in hab maamulka gobolka Banaadir uu ka tarjumayo habka hoggaaminta.

Marka labaad, waxay ka qaybgalayaashu tilmaameen muhiimadda ay leeyihiin habraacyada iyo hannaanada khuseeya doorashada ama xulashada hoggaamieyaasha. Sida uu ka qaybgale u dhigay, maamulku waa "sida bulsho u xulato madaxdeeda", halka uu mid kalena ku sheegay in maamulku yahay "marka ay dadka doortaan hoggaamiyehooda." Haddaba, ereyga 'sida' ee qaybta hore ee xigashadan Waxa uu muujinaya habraac doorasho, halka ereyga 'marka' eek u jira qaybta labaad ee xigasha uu ka tarjumayo muddo-xilliyeedka doorashada. Aragtidani waxay xambaarsan tahay xaqiiqada ah in hoggaamintu tahay habraac iyo mirodhal.

Midda saddexaad, hoggaamiyeyaasha wanaagsan waxaa aqoonsada muwaadiniintooda,  waxayna ku gartaan waxqabadkooda iyo adeegyada ay shacabkooda u fidiyaan, sida waxbaridda, hagidda, naxariista iyo bixinta adeegyada muhiimka ah oo ay ka mid yihiin amniga, daryeel caafimaad, shaqo abuurka, fursadaha tabbarka iyo weliba danaha/baahiyaha dadka soo doortay iyo bulsho weynta guud ahaan.  Haddaba maadaama dadku horay u barteen waxqabadka wanaagsan ee hoggaamiyahooda, habraaca doorashadu waxaa loo arkaa in uu yahay uun arrin farsamo oo lagu xaqiijinayo adeeggii hore. Fikrad kale oo ka soo dhex baxday aragtida dhallinyarada gobolka Banaadir waxay ahayd muhiimadda ay leedahay in la qaato/dabaqo habka wada-ogolka ku salaysan marka madaxda la dooranayo. taasoo waafaqsan oraahda Soomaalida ee ah "wadar-ogol" oo macnihiisu yahay "hannaan laysla wada-ogolyahay" kaasoo samaysmay muddadii lagu jirey hannaanka dawlad-dhiska colaaddii kadib. Fikradda "wadar-ogol" waxay ka heshay aqbalaad baahsan inta badan bulshada Soomaaliyeed haddana waxay isu bedeshay mid ka mid ah mabaadi'da waaweyn ee maamulka /dawladnimada.

Dhallinyarada gobolka Banaadir waxay tilmaameen astaamaha uu leeyahay hoggaanka waxtarka leh oo ay ka mid yihiin karti, waxqabad, isla xisaabtan, daah-furnaan, ku foognaanta baahiyaha bulshada iyo ka go'naanshaha hirgelinta caddaaladda. Waxay astaamahaasi xoojiyaan sharciyadda hoggaamiyaha uu bulshadiisa ka haysto waxayna adkeeyaan is aaminaadda/kalsoonida u dhexeeysa hoggaamiyaha iyo shacabkiisa, taasoo ka sii qaybqaadata tayada maamulka. Fikradda caddaaladda ayeey dhammaan ka qaybgalayaashu si gaar ah diiradda u saareen, iyagoo ku dooday in tilmaamaha maamul wanaagga lagu garto ay ka mid tahay hirgelinta adeegga cadaaleed, xaqiijinta in khayraadka/hantida si siman loo qaybsho iyo la dagaalanka musuqmaasuqa. Iyadoo labada maduuc ee caddaaladda iyo musuqmaasuqu ay ahaayeen kuwa sida joogtada ah ka qaybgalayaashu u cabbireen intii xiisaddii sawir-gacmeedka ahayd lagu jirey.

Waxaa xusid mudan, in caddaaladdu ay ahayd mawduucii 1aad ee ay kooxaha dhallinyarada ahi sawir ku muujiyaan ama ku fikiraan inteey ku guda jireen sawir-gacmeedka, iyagoo u arkay in ay tahay tiir muhiim ah oo ka mid ah maamul wanaagga ee gobolka Banaadir.Dhallinyarad gobolka Banaadir waxay soo bandhigeen sawiro ka tarjumaaya maamul wanaagga oo ah hannaan kor loogu qaadayo sarreeynta sharciga laguna hubinayo in cidkasta loo caddaalad falay. Tani waxay hoosta ka xarriiqaysaa filashada dawladda laga qabo oo ah in ay hirgeliso nidaam caddaaladeed oo hufan oo dhexdhexaad ah muwaadin kastana uu heli karo.

Si ka duwan sawirradoodii caddaaladda, sawir-gacmadeeda ka qaybgalayaashu waxay saamayn leh badan u soo bandhigeen mawduuca caddaalad darrada oo ay ku muujiyeen muuqaal ahaan iyo oraah ahaanba. Muuqaaladaasi waxay ka tarjumayeen caddaalad darrada iyo qadarin la'aanta ka dhex jirta maamulka garsoorka gobolka Banaadir. Haddaba, farriinta ku duugan oo ay sawiradan iyo muuqaaladani dirayaan waxay tahay baaq ku saabsan in nidaamka caddaaladda ee gobolka Banaadir la horumariyo.

Sidaa si la mid ah, waxay dhallinyaradu isku xireen fikradda musuqmaasuqa iyo maamul xumada. Waxay sawireen muuqaallo iyo sawiro la taaban karo oo ay ka buuxaan laaluush iyo siyaasiyiin hunguri weyn oo hantida iyo lacagta ummadda boobaya iyadoo bulshadii ka baahan tahay. Sidoo kale, waxay sawiradoodu muujiyeen ku tagrifalka awoodda oo dano gaar ah lagu gaaro, taasoo ka tarjumeeysa maamul xumo. Sida ay qabaan dhallinyaradu, musuqmaasuqu waa caqabadda ugu weyn ee haysata gobolka Banaadir iyo gabi ahaanba Soomaaliya, kaasoo mijaxaabinaya sharciyadda hay'adaha dawladda. Marka laga hadlo ka qaybgalka dhallinyarada ee maamulka iyo dhismaha dawladnimada ee gobolka Banaadir, waxay cabbireen waayo-aragnimadooda dhabta ah iyo rajada kaalintooda mustaqbalka ee nabadda iyo horumarka gobolka Banaadir iyo guud ahaan Soomaaliya. Aragtidan dhallinyaradu waxay si wayn uga soo horjeeddaa fikirkii jiilasha ka da'da weyni ka qabeen oo inta badan u arkayey dhallinyarada in aaney wax badan soo biirin karin khibrad iyo bisayl la'aan dartood. Marka laga hadlayo kaalinta dhallinyarada ee arrimaha maamulka, nabadda iyo dawlad-dhiska, waxay dhallinyaradu ku soo celceliyeen in shacab weynaha Soomaaliyeed ka yihiin qiyaastii 70% ilaa 75%. Waxayna ku doodeen in tiro badnidaas bulshada dhexdeeda aaney ka dhigeeyn karaanka buldhada Soomaaliyeed oo kaliya balse ay sidoo kale ka dhigeeyso mulkiilayaasha qaranka ee mustaqbalka.

Waxaa taas sii dheer, in ay dhallinyaradu xuseen ka qaybqaadashadooda muhiimka ah dhinacyada ganacsiyada yar yar, waaxyaha amniga iyo weliba isdiriddooda iyo ka falcelintooda dhakhsaha leh eek u aaddan hawlaha samafalka iyo musiibooyinka dabiiciga ah iyo kuwa bani'aadamku sababo. Iyagoo sharxaya ka qaybgalkooda hadda, dhallinyaradu waxay soo xigteen doorkii taariikhiga ahaa ee ururkii Leegada (SYL) kuwaas oo madaxbanaanida dalka u soo halgamay. Tani waxay muujineeysa wacyigooda iyo fahamkooda geeddi-socodka dhismaha dawladnimada, laga soo bilaabo maalmihii kowaad ee xornimada ilaa maanta laga soo gaarayo. Ayadoo inta badan dhallinyarada gobolka Banaadir ay aad u fahamsan yihiin doorkooda ku aaddan hannaanka dawlad-dhiska, hadana qaar ka qaybgalayaasha ka mid ahi waxay dareensan yihiin matalaaddooda tiro ahaaneed aaney si macne leh uga tarjumeeyn ka qaybgalkooda xagga maamulka, hoggaaminta iyo go'aan-gaarista.

Gaar ahaan, gabadh ayaa ku doodey in iyaga dumar ahaan aaney matalaad saxa haysan marka la barbar dhigo dhallinyarada ragga ah oo xilal muhiim ah ka haya Maamulka Gobolka Banaadir, gaar ahaanna heer degmo.

Sida muuqata, waxaa arrintan saameeyn ku leh aragti dhaqameedka bulshada Soomaaliyeed da'da ka qabto, taasoo ah in qofka 40 sano ka yar loo tixgeliyo dhallinyaro. Siyaasadda Qaranka ee Dhallinyarada ee Dawladda Federaalka Soomaaliya ayaduna waxay sii xoojineeysaa isla qeexitaankaas, iyadoo dhallinyaro u aqoonsan dadka da'doodu u dhexeeyso: 15-40 sano. [162]/[163] Haddaba, marka ay qaybqaatayaasha daraasaddu sheegayaan in dhallinyarada gobolka Banaadir ay jagooyin muhiim ah hayaan, waxaa muhiim ah in la fahmo in ay qeexitaankan tixraacayaan.Iyagoo ka hadlaya ka qaybgalkooda nabadda iyo dhismaha dawladnimada, dhallinyaradu qireen in ay jiraan caqabado badan oo ku hor gudban ka qaybgalkooda arrimahaas.

Caqabadda ugu weyn oo hoosta laga wada xarriiqay intii lagu jirey dhammaan waraysi-kooxeedyadu sawir-gacmeedyadana lagu muujiyey waxay ahayd faquuqa siyaasadeed oo uu sabab u yahay habka awood-qaybsiga qabiilaysan ee 4.5 ka. Kaasoo ay u arkaan in uu yahay nidaam ku salaysan musuqmaasuq iyo caddaalad darro, iyagoo sheegay in habka 4.5 uu ku fashilmay in uu door bido amaba xattaa uu tixgelin siiyo doorasho habka-doorsoocashada ku dhisan, isagoo taas bedelkeeda yaqaan xulasho ku salaysan qabiilaysi iyo nin jeclaysi. Caqabadaha kale waxaa ka mid ah la'aanta fursado waxbarasho, kuwaasoo haddii si fiican wax looga qabto horumarin lahaa hal-abuurka dhallinyarada. Qaar dhallinyarada ka mid ahi waxay xuseen aragtida taban ee jiilasha waa weyni ka qabaan, taasoo inta badan dhallinyarada u sawirta in ay yihiin kuwo aan karti u lahayn maamulka iyo hoggaaminta. Haddaba, si sawirkaa qaldan loo saxo, dhallinyaradu waxay carrabka ku adkeeyeen baahida loo qabo dood dhex marta jiilasha kala duwan. Dhanka jinsiga marka laga eego, qaar kaqaybgalayaasha ka mid ahi waxay sii xoojiyeen daraasad hore oo sheegeysay in dhabdhuhu la kulmaan caqabado u gaar ah marka lagu jiro hannaanka dhismaha dawladnimada, caqabadahaas oo ay ka mid yihiin: faraxumayn, tacaddiyo xagga jinsiga ah iyo oraahyo liddi ku ah dumarka, kuwaas oo sii cusleeya ka qaybgalkooda.

Arrimaha ku saabsan khilaafaadka rabshadaha wata ee ka dhaca gobolka Banaadir iyo meelo ka baxsanba waxaa ka midah noocyada rabshadaha, sababaha salka u ah, cawaaqibta ka dhalata iyo istaratiijiyadaha looga hortagi karo. Waxaa ka mid ah nooc cusub oo loo yaqaan 'Ciyaal Weero', rabshadaha maandooriyaha la xiriira iyo rabshadaha ka dhasha madalaha baraha bulshada, sida Tik Tok. Isku dhacyada noocan ahi waxay caan ka noqdeen gobolka Banaadir, si ka duwan Galmudug oo colaadaha qabiilka ku salaysan ay tahay dhibaatada ugu weyn.

Marka la eego Gobolka Banaadir iyo Galmudug ba, waxay dhallinyaradu xoojiyeen kaalinta ay malayshiyaadka qabiil ee aan nidaamsanayn iyo al-shabaab ku leeyihiin sii socoshada isku dhacyada rabshadaha wata. Dhallinyarada gobolka Banaadir waxay si gaar ah xooga u saareen in siyaasadda haybta qabiil ku dhisan ay tahay caqabad adag, tani waa dareen ay sii xoojinayaan daraasado badan oo qalalaasaha siyaasadeed ee Soomaaliya ku saabsan.

162. The National Youth Policy of the Federal Government of Somalia.
163. Saferworld. Clans, consensus and contention: Federalism.

Marka aragtida dhallinyarada la eego, gocashooyinka qabiil ee taariikhiga ah oo ay ku jiraan dagaaladii hore iyo murannada dhalka ayaa waxay ka mid yihiin sababaha ugu waa weyn saldhigga ah colaadaha guud ahaan Soomaaliya. Dhallinyarada gobolka Banaadir waxay soo xigteen colaaddii dhex martay SSC-Khaatumo iyo Somaliland, taasoo ah tusaale nool.

Ka qaybgalayaasha daraasaddu waxay tusaale u soo qaateen colaaddii u dhexeeysay beelaha Isaaq iyo Dhulbahante. Khilaafkan oo yeeshay ujeeddooyin siyaasadeed oo ah in beelaha Isaaq ay taageerayaan goonni isu taagga Somaliland, halka beelaha Dhulbahante na ay u ololeynayaan midnimada Soomaaliya ayna ka soo horjeedaan aragtida gooni u goosadka ah. Marka heer qaran laga eego, dhallinyarada gobolka Banaadir waxay nidaamka federaalka- oo ah mid ku cusub Soomaaliya- ku tilmaameen in uu yahay isha khilaafaadka iyo rabshadda. Tusaale ahaan, khilaafaadka la xiriira nidaamka federaalka waxa lala xiriirin karaa murannada xuduudda ee u dhexeeya Puntland iyo Galmudug, gaar ahaana midka ku saabsan magaalada Gaalkacayo. Intaas waxaa dheer, xiisadda u dhexeeysa dawladda federaalka ah iyo dawlad goboleedyada oo inta badan lagu sababeeyo faham darro xagga hannaanka federaalka ah.

Markii hoos loo eego gobolka Banaadir, waxay dhallinyaradu tilmaameen khilaafaad siyaasadeed oo ku salaysa ishaysi qabiillada dhexdooda ah, kaasoo ka dhasha samaynta degmooyin cusub oo qayb ka ah hanaanka dawlad-dhiska. Waxay sidoo kale xuseen arrinta daadejinta awoodaha oo laga keeno dawladda federaalka ah, heer dawlad goboleed ilaa heer degmo. Dhallinyarada gobolka Banaadir waxay rumaysan yihiin in maamul xumadu ay tahay isha ugu weyn ee khilaafaadka rabshadaha wata. Waxay ku doodeen in marka dawladnimadu fashilanto ay dadku u laabanayaan hababka qabiilka ku dhisan si ay uga hortagaan colaadaha iyo isku dhacyada. Si kastaba ha ahaatee, ku tiirsanaanta hannaanka qabiilku waxay sii hurineysaa khilaafaadka ka dhexeeya beelaha halkii uu wax xallin lahaa, taasoo aakhirka keeni karta in ay colaad qabiil oo rabshadaysan ka dhex qaraxdo. In kastoo ay ku koreen magaalada cammiran ee Muqdisho, haddana dhallinyarada gobolka Banaadir waxay wacyi fiican ka haystaan asbaabaha khilaafaadka ka jira nolosha reer miyiga, sida isku haysiga la xiriira biyaha, xoolaha nool, daaqa iyo meela roobabku ku da'aan. Taasna waxaa sabab u ah in nolosha Soomaalida ee magaalada iyo tan miyiga ay isku xiran yihiin iskuna tiirsan yihiin.

Marka laga hadlo raadadka xun ee khilaafaadka rabshadaha wata, waraysi-kooxeedyada iyo sawir-gacmeedyadaba waxay muujiyeen natiijooyin isku mid ah. Tusaale ahaan, dhallinyarada gobolka Banaadir waxay soo bandhigeen khasaaraha nafeed ee ka dhasha colaadaha oo ay ku muujiyeen sawirro muujinaya burburka hantiyeed, qaxa iyo barakaca baahsan,dhibaatooyinka deegaan, burburka is aaminaadda, hoos udhaca taranka iyo faafidda cudurada. Muuqaalladaasi waxay si fiican u soo bandhigeen cawaaqibta xun ee colaadaha iyo rabshadaha.

Haddaba, si looga hortago colaadaha rabshadaha wata, dhallinyaradu waxay soo jeediyeen in la horumariyo maamulka gobolka Banaadir, sababtoo ah waxay si adag u rumaysan yihiin in maamul xumadu ahayd isha ugu weyn ee colaadaha rabshada wata ka dhasheen.

Xalalka kale waxaa ka mid ahaa in la dhiso kalsoonida bulshadu ku qabto hay'adaha dawladda, hirgelinta adeeg caddaaladeed iyo in si siman sharciga loo dabaqo, si loo hubiyo in madaxda dawladda iyo shacabka caadiga ahba ay u sinnaadaan sharciga oo cidina aaney ka sarreyn.

Waxay kaloo soo jeediyeen in dhallinyarada gacan lagu siiyo si ay u bartaan hababka dhaqanka ee ka hortagga colaadaha iyo xallinta khilaafaadka, iyagoo lagu dhiirigelinayo ineey la falgalaan jiilasha waaweyn. Waayo macluumaad iyo waayo-aragnimo iswaydaarsigaas waxa uu sahlayaa in isbedel aqoon-dhaqameed iyo khibradeed ay jiilasha yar yari ka dhaxlaan jiilashii hore. Dhanka kale, isla falgalkaasi waxa uu jiilasha dadka waa weyn ku kaalmaynayaa fikrado iyo aragtiyo iyo weliba khibrado ay dhallinyarada maanta tiknolojiyadda adeegsadaa hayaan.

Tababarrada iyo Siminaarrada loo dejiyey qaab dad gaar ah loogu talagalay, waxbarasho tayo leh iyo fursadaha shaqo ayaa waxay siyaadinayaan xirfadohooda ka hortagga iyo maaraynta colaadaha. Hindisayaashaasi waxay sidoo kale gacan ka geeysan karaan yaraynta khilaafaadka rabshadaha wata, gaar ahaanna kuwa ka dhex dhaca dhallinyarada ka soo jeedda bulshooyinka duruufaysan oo inta badan ay saamayn xun ku yeeshaan rabshaduhu.

# 9. Gunnaanad

Gunnaanadkii, waxay argtida iyo waayo-aragnimada dhallinyaradu muujisay in haddii si saxan looga qaybgeliyo ay dhallinyaradu kaalin muhiim ah ka ciyaari karaan maamulka, dhismaha dawladnimada iyo ka hortagga colaadaha ee gobolka Banaadir iyo Somaliya guud ahaan. Sidaa darteed, waxay ka qaybgalayaasha daraasaddan carrabka ku adkeeyeen muhiimadda ka qaybgelinta dhallinyarada hannaanadaas, iyagoo sidoo kale hoosta ka xarriiqay doorka aadka u muhiimka ah ay ku leeyihiin horumarka, koboca dhaqaale iyo deganaansha gobolka Banaadir. Waxaa kale oo muhiim ah, in ay xogta waraysiyadu muujisay in ka qaybgalayaashu ay faham fiican ka haystaan fikradaha maamulka, dawlad-dhiska iyo ka hortagga colaadaha ee gobolka Banaadir iyo Soomaaliya si guud. Inta ugu badan ka qaybgalayaashu waxay ogaal fiican ka haysteen caqabadaha hortaagan ka qaybgalkooda nolosha dawladnimo, sida ay ku caddeeyeen jawaabohooda fikradaha toolmoon iyo hal-abuurka ku dhisan ee khuseeyey sida wax looga qaban karo caqabadaas la soo xusay. Si kooban, dhallinyaradu waxay muujiyeen danaayn iyo rabitaan ay u hayaan sidii loo horumarin lahaa ka qaybgalka dhallinyarada, awoodohooda, dhisidda karaankooda iyo sidoo kale ururada bulshada rayidka ah ee gobolka Banaadir.

## 10. Talabixinno siyaasadeed

- Samaynyta ka qaybgelin siyaasadeed oo loo dhanyahay iyo matalaad ku dhisan dhaqangelinta hannaanka doorashooyinka tooska ah, ayadoo loo marayo habka matalaadda isu dheelitiran (PR)

- In mudnaanta kowaad la siiyo la dagaalankan musuqmaasuqa iyo isla xisaabtanka haykalka dawladnimo, iyadoo la raacayo nidaamka daahfurnaanta iyo hoos u dhigidda habka siyaasadda qabiilaysan

- In la dhaqangeliyo nidaamka shaqaalaysiinta doorsoocashada ku salaysan ee maamulka dhexdiisa.

- In sameeyo barnaamijyo, maamullo, hab-dhiska siyaasado iyo hindisayaal looga gol leeyahay dhiirigelinta dhallinyarada ee dhanka shaqaalaysiinta, fursadaha ka dhex jira hannaanka maamulka iyo dhismaha dawladnimada, isku xirka dhallinyarada si kor loogu qaado ka qaybgalka siyaasadeed.

- In ay dawladdu gacan siiso ka qaybgalka dhallinyarada ee siyaasadda iyo qorshayaasha dawlad-dhiska, oo loo marayo maalgelin iyo u samaynta ilo maaliyadeed iyo sidoo kale in la dhiirigeliyo ka qaybgalka dhallinyarada dadaallada rasmiga iyo kuwa aan rasmiga ahaynba, diyaarinta goobo caam ah iyo abuuridda bay'ad ku habboon in ay dhallinyarada ka qaybgalaan hababka go'aan-gaarista iyo horumarinta dhallinyarada maadaama ay yihiin danayayaasha hannaanka dhismaha nabadda.

- Baabiinta fahannada qaldan ee ka qaybqaadanaya kala sooca iyo faquuqa iyadoo la adeegsanayo waxbarasho qorshaysan iyo banbaxyada bulshada, samaynta wax kala barashada jiilasha iyo doodaha isdhexgalka ee ku saabsan hawlaha danta guud iyo aayakatashiga



HERITAGE
INSTITUTE

The Heritage Institute for Policy Studies
http://www.heritageinstitute.org